Luulyo - Sebtembar 2024 - Cadadka 36
Ssh.80,000 - Kshs.300, USD 3

# WARSAN

WACYI-GELIN | TOOSIN | DHISID



# Dr. Biday: " Adoo mutta maahee, heli meysid"

Caisse Nationale
de Sécurité Sociale




Po Box 696 - Telphone: 21350321 – Fax: 21355832- Jabuuti- Jamhuuriyada Jabuuti



Publisher - Tifatiraha
Nur Elmi

Managing Editor:
Mohamed Nur

Associate Editor:
Victor Adar

**Staff Writers:**
David Onjili
Chritine Siamanta
Dahir A. Mahamud
Leila Mohamed
Fuad A. Mohamed

Designer:
Graphic Lineups Ltd.

Advertising and Marketing:
David Odhiambo
Omar N. Ali

**Productions offices:**
Mohamed Osman Elmi
Mogadishu - Somalia
+252 616 460 132
+252 616 4643 7490

**Nairobi Office:**
+254 721 883 458

**Djibouti Office:**
+253 778 721 23

Contact informations:
info@warsan.com
Editor@warsan.com
warsan54@gmail.com

www.thewarsan.com

**Warsan Media Ltd.**



The views and the opinions expressed in this publication are those of the authors and do not necessarily reflect the position of Warsan Magazine.


WARSAN
WACYI-GELIN | TOOSIN | DHISID

# Macluumaadka *Gudaha*


5


15


21


27



38


49


51


5 Dr. Biday: "Waa been, adoo mutta maahee, heli meysid"
15 Sebenka Lafa Laba God Leysu Weydaariyey Iyo Muwaadin Cadow Loo Gacan Geliyey Sinmeen!
21 Bulsho Wax Walba Aqbasha Hiiraan Kow
26 Somaalidu in dad kale maamulo ayey jeceshahay
27 Bare-sare Axmed Samatar Isagaa Dadka Is-nac-siiyey, Siyaasaddana ku Saaqiday
28 Ab-tirsataye ayaad tahay?
31 Caanaha samayska ah dhallaanka uma roonee ha xayeysiin
34 Maxaa Ka dhaxeeya ogaalka badan iyo murugada !
36 Garashooy kuma waayo.
38 Loolanka raga iyo Dumarka
40 Duqa Mooge: Halyey Soo Baxay Xilligii Loo Baahnaa
42 Waa Khatare Yeynaan Ku Degdegin
44 Tayo Darrada Dawooyinka Dalka Dibada Uga Yimaada
46 Danjire Iyo Shaqada Uu Qabto
47 Joojiya Ceebaha Ka Dhanka Ah Gabdhaha Soomaaliyeed.
48 Maxaa Daawo U Ah Hilmaanka?
49 Waxan ahaa gabadh yar oo 17 jir ah, markuu....
51 Ha Laga Tago Sadbursiga!
54 Itoobiyadii dhulku ku maqnaa ma bad baa loogu Darayaa?.
56 Maxaa ina tusay waxa inaga maqan oo kaliya?
57 kursi la weeraraa, kursi la weeraro ayuu leeyahay

FAALLO

# HADDAAN UGU BAAHI BADANNAHAY!

Waagii ii baryaba, waxa ka dhacaya dalka, waxay i xusuusineysa, halganka aan dhamaadka laheyn ee aan ugu jirnno inaan badbaadnno dad iyo dalba. Keennu (dalka) waa dalka kaliya ee Afrika ku yaal ee dhulkiisa ay qeybsadeen isticmaarkii reer Yurub iyo kuwa aan kuwaa la jinsi aheyn. Keennu, waa dalka kaliya ee dunida ku yaal ee dadkiisa lagu qasbay inay sanooyin noolaadaan xukuumad facaala la'aanteed.

Awoodo ayaa jira isu diray inay xaqiijiyaan, oo hubiyaan inaan guul-darreysanno- kufnno, si ay toodu u nagaato. Laakin, waxa nasiibdarro dheeriya ah, marka dadkeyga qaarkii u banbaxo, dabar-goonta waxa aan dad ku nahay.

Markaan sawiranno riyooyinkeenna guud, waa inaan donnaa, sidii aan u ahaan laheyn waddaniyiin u soo jeeda danahooda - taasoo mararka qaar naga dooneysa halgan joogto ah oo aan dhamaan. Dhab ahaan markaan uga fekernno nolosha iyo waqtiga ku baxay halgankeenna iyo halgamayaasheenna ku xusan taariikhdeenna halganka, Axmed Gurey, Aweys Al-baraawi, Sheekh Xasan Barsane, Maxamed Cabdille Xasan iyo sidoo kale dhallinyaradii SYL, kuma deg degeynno inaan dalkeenna xaraashnno.

Waa suurowdda inaan hellay madaxbannaani, laakin, hanashadeedii buu dhib naga heystaa, waayo gumeystaha ayaa habeen iyo dharaar maleega dibin-daabyo iyo tabo uu ku hantiyo dhaxalkeenna iyo innagoo farxaha is heysnna, midnnimana xaqiijin weynnay. Waajib, waxa nagu ah goor kasta inaan eegnno diinteenna, dadnnimadeena iyo ruuxa Somalinnimada ee isku keen xidha.

Bal in yar dib u fariiso- oo malee: Ma naqaan halka aan ka nimid? Ma fahamsan-nahay xaalladda hadda aan ku jirnno? Ma naqaan cidda aan nahay? Ma fahamsan-nahay, runtii ma fahamsan-nahay, halka ay noo waddo qeybsanaanta hadda? Ma fahamsan-nahay, mana nala qurxoontay, siyaasad-goboleedka yeeriya, waxa ka socda hareeraha-yaga?

Wax laga xumaado oo kaliya maaha, hayeeshee, waxay kalooy tahay wax laga cabsado in qaarkeen ka fekeraan danta u gaarka ah kaliya. War waxan joognaa waqtigii aan is-uruusan laheyn oo cududdeenna isugeyn laheyn, dhanna isu raaci laheyn. War waa inaan wada shaqeynno, soona kala hormarsanno danaha dalkeenna maareyntooda. Waa ineynaan qeyb ka ahaanin oo cadowga gacan ku siin waxyeellada iyo burburinta qarankeenna.

Cadowga dibadda oo tira-beelay awgeed, waa ineynaan innagu ableyda isula bixin oo dhabarka iska toogan. Waxa la joogaa waqtigii aan garabka isku qaban laheyn si aan Somaaliyadeenna u difaacnno. Yeynaan aqoonteenna u adeegsan duminta iyo cadow-kalkaalista. Yeynaan kheyraadkeenna xaraashin.

Yeynaan bowdada iska toogan oo isku mashquulin, cadowgaa fursad helayee. Waxan leenahay dal mid la siistaa jirin; aan difaacanno, oo yeynaan iibin. War hooy dal aan Somaaliya aheyn ma lihin. Waa waxa kaliya oo aan heysanno. Wax badan ayaan xaqiijin karnaa, laakin, waa markaan mid nahay, is-jecel nahay, is-buuxinno oo wax isu oggol nahay. Allow garab na sii.

**Nur Cilmi- Tifatiraha**



# Dr. Biday: "Waa Been, Adoo Mutta Maahee, Heli Meysid"




**Dr Biday iyo wasiir Cabdulqaadir Faarax (labaad, sadaax, midigta)**

Aadanaha xoolaha waxa ka sooca garashada, ibta garashona waa maskax, maskaxina waa hibo Alle. Ifka, hooyo ayaa leylinta hore yeelata, iyadaa ah wadada aadane ku soo gaaro dunida, higaadda hadalkana ku ababisa. Safarka yeelasho-aqooneed ayaa bilowda, waayuhu halka uu kuu jaheeyaba, idlaanna meyso illaa lugtu luxudka kuu tilmaanto. Aadane wax ku ool ma noqdo, hadduusan helin aqoon ka dhigta mid u qalma waxa loo abuuray iyo cidda abuurtay.

Iftiinka aqoonta kaan helin, khatar buu ku ahaanayaa naftisa, qoyskiisa, bulshadiisa iyo koonkaba? Haa shaki la.

Siyaasadda dhanna diida, ur cid u bixisana la waayo gar-wadeenkeed waa isaga. Dhaqaalaha kobci waaya, xatooyada yacda weyda iyo bulsho sabool ka bixi weyda, aabaheed waa isaga. Nabadgelyada saldhigi weyda, waa **"ka jawaabeynaadu"** waraabiso,

Eeg Bogga 6

Ka yimid Bogga 5

jilaageedu waa isaga. Bulshada diin iyo dhaqanba weedarata, xad kasta ka talowda, diiwaanka xishoodka xidha, hoggaamiyaheedu waa isaga. Bal qiyaas bulshada tafaasiishaa yeelata cidhibteedu waxa ay noqon!

Ma dafireynno in labada jaaninbba ku dhex dhuuman karo fara-ku-tiris xun ama fiican, ujeedaduse, waa dhudhuminta mugdi iyo iftiin (aqoon-aqoondarro). Saasoy tahayse, badanaa aqoonyahanle hab-dhaqanka midaan alifka loo bilaabin, sow markaa in lagu weeleeyo khasnnadda alif-laawaha dow noqonmeyso?

Culimada baarta dabeecadaha aadanaha, waxay yiraahdeen aadane waa **"hoggaamiye ama la-hogaamiye"**, haddana waxay raaciyeen inaan mar u dhaqan ekaataanno nafleyda kale ama duur-joogta, markaasna waa marka la waayo cid wax hoggaamisa, allow-sahalna fursad helo, xaaladdu murgto, illaa loo ekeedo oowr seenta leysaga xidhay.

Geel uma soofee, ma innagay na booqddeen, oo sifaha duur-joogta naga heleen. Haddii warbixinta na loo ka been abuuray, maxaa keenay in Ra'iisalwasaare Hamsa yiraahdo; **"hadda waxa la gaaray waqtigii aan sida dadka u noolaan laheyn"** sow muu qirin duur-joog inaan dhaqan-wadaag leennay, welina dhexda u naallo.

Haddii la yidhi, aqoon la'aani, waa ifiin la'aan, maanta dalkeennu dhinacaa halkuu ka marayaa, 30 + gu oo aan iska lulanno kadib. Yaase door ku lahaa waxbarashada waqtiga adag ee aan weli naga dhamaan, yabyabka waxbarasho ee aan maanta heysannse, yaa gacan ka geystay? Bal aan jidka gadaal idiin qaadsiinno.

Waa sidaase, gugii 1998 kii, 120 takhtar ayaa dood geliyey talo uu lahaa Alla ha naxariistee Dr Maxamed Adan Warsame, bal haddii dib loo howlgelin karo jaamacaddii qaranka, kulliyaddii caafimaadka, si loo daboolo baahi dhinaca xirfadleyda caafimaadka ee iman kadhay, fursad tacliin sarena loo siiyo arday dugsiyada sare ka baxday oo suuq daadsaneyd. 13 takhtar ayaa ka dhabeeyey taladaa loo aayey, kulliyaddiina dib u howlgeliyey.

Gu'yaal doora kadib, waxa soo burqaday hey'adaha tacliinta sare oo gaarka loo leeyahay, sharciyo nidaamiyana aan weli loo meel marin ayaa waxa in dhawaalaba soo baxayey eedeymo salka ku haya tayada, bixinta shahaadooyinka macmala iyo tira kaloo badan.

Majallada Warsan, saddax bille akhristayaal badan kule dalka, ayaa muddaba heleysay codsiyo ku aaddan bal in cabashooyinkaa xaqiiqadooda laga daba tago. Majallada waxa u suurowday inay la kulanto mid ka mida 13ka takhtar ee kor ku xusan. Waa takhtar



Dr Maxamed A. Warsame


QODOBKA 24-AAD:

QODOBKA 25AAD:

SAXIIXA SAAMILAYDA
MAGACA

SAXIIXA

Maxamed Maxamuud Xasan (Biday). Takhtar Maxamuud oo hadda ah guddoomiyaha Jaamacadda Banaadir, waxa uu naga oggolaaday inaan la kullanno, xog-ogaalnna u noqonno tacliinta sare guud ahaan, gaar ahaan JB ee uu maareynteeda hayo.

Waxan ku socdaa xafiiska guddoomiyaha, kama foga degaankeyga, daqiiqado kadib, waxan soo gaaray aqalka looga taliyo Jaamacadda Banaadir, waa guri lix dabaqa, barxad weynna le. Waa goob ii sawirtay waayihii wacnaa ee ardaynnimada. Arday gabdho iyo wiilalba le ayaa isku mashquulsan, laga yaabee inay fasallada ka soo baxeen, malaheygana ka doodaya casharku siduu u adkaa ama macallinkoo magacyo badan la siiyo- waa waddo aan ku soo jarmaaday.

Tilmaan baan helay le, dabaqa lixaad adoo taga maa-


Kuliyadda dhismaha

hee, madaxweynaha JB heli meysid. Xambaaraha dabaqa 6aad i gaarsiin lahaa baa waxa gaadh ka haya, gaar-ahye aad mooddo in la yidhi; **"Yaa weylak, haddaad qofaan ballan u oolin soo deyso"**. Ballanku waa ii yiil.

Waxan soo galay xafiis aad u bilicsan, wax walbana cusub yihin, gabadh baan bariidiyey, oo isu sheegay. Intey ka soo booday gambarkii ayey inta qol iga furdhay, "gal i tidhi" Markaan galay qolka guddoomiyaha, waxa kursigiisa ka soo booday, nin dheer, timo cad oo xariira le, ifaaya, weji furan, qosol yarna lagu iidaamay, aqoonta iyo waayo-aragnnimada ku qarsanna muuqaalkiisa laga dheehanaayo. Aqooni waa ta ku bisleysee, assalaamu Caleykum iyo laab-saar ayuu isugu key daray. Nagu yaraa noociisu baan hoos ka yidhi!


Ardada kulliyadda Caafimaadka Xoolaha

Eeg Bogga 8

Ka yimid Bogga 7



Ardada kulliyadda Caafimaadka

Waresigu su'aashan ayuu ku bilowday:

**Warsan:** Guddoomiye, si kooban ugu sharrax Dr Maxamed Maxamuud Xasan (Biday) qof aan aqoon.

**Dr Biday:** Somaali ku dhashay Marka, gugii 1964tii, waxbarashda hoose iyada ka soo bilaabay, Macallin Jaamac, 15 May ku xijiyey, Jaamacaddii Ummaddana ka qallin jebiyey gugii 1981kii. Waxan ahay takhtar daaweynta guud iyo qalliinka ku xeeldheer. Shahaadada labaadna lagu siiyey la-tacaalidda cudurrada haleela wadnaha.

Assaasahii Isbitaalkii Xayaat, oo inuu adeeg caafimaad bixinaayey ka sokow, soo tababaray kalkaaliyeyaal badan oo maanta adeegga caafimaadka kaalin mugle uga jira. Anoo weli bixiya adeegga caafimaad ee bulshadeydu u baahan tahay, ayaan haddana, hadda ahay guddoomiyaha JB.

**Warsan:** Maxaa loogu baahaday in JB la curiyo, yaase taladeeda lahaa?

**Dr Biday:** Taladeeda waxa lahaa (Alla ha u raxmadee) Dr Maxamed Adan Warsame, kadib, waxa kulmay 120 takhtar, doodna geliyey talada oo nuxurku ahaa in dib loo howlgeliyo Jaamacaddii Ummadda, kulliyaddii caafimaadka. Dood dheer kadib, waxa loo arkay soo jeedinta talada, rabitaan riyo ah oo xaaladda lagu sugan yahay dhaqan geli karin (gugu waa 1998kii).

13 takhtar ayaa haseyeeshee diiday in taladu halkaa ku xijaabato, wacadna ku maray inay dadaal bixiyaan, tabari meel ay dhigtaba. Guri dhowr qola ayaa la kireeyey, 38 aradayna waa lagu bilaabay, takhtar walbana keydkiisa buugaagta aqoonta caafimaadka laga qudhqudhiyo ayuu hibeeyey.

Cidina sooma qaadin dan gaara, ta guud ayaa aheyd udub dhaxaadka, aqoontoo la gudbiyo, lana diyaariyo xirfadleyaalkii guyaalka soo socda hanan lahaa adeegga caafimaadka bulshada Somaaliyeed.




Xarunta Jamacadda Banaadir

Maanta waa tan le 13 kulliyadood, aqoon kala duwan siisa 7000 arday, aflaxisay 10,000 kale, leh howlwadeenno gaarraya 300 qof, 180 barayaal yihiin. Si aannad ii weydiin magaca Jaamacadda Banaadir goorta uu baxay, waxa uu dhashay gugii labada kun iyo labada (2002da), mar haddey jaamacaddu noqotay mid gaar loo leeyahay.

**Warsan:** Ardadu xaggey ka imaanayeen, mar haddeyan waqtigaa jirin dugsiyo sare oo macna le, idinkase marna ma idinku soo dhacaday inaad dugsiyo sare abaabushaan?

**Dr Biday:** Dallado waxbarasho ayaa jiray oo maamuli jiray tira doora oo dugsiyada sare ah, innana maba aanaan qaadan karin arday badan, qalabka, barayaasha iyo dhaqaalaha oo aad u koobnaa awgeed. Maya marna kuma aanaan talloon inaan dugsiyo sare furnno, yoolkeennu tacliinta sare ayuu ahaa, welina yahay.

**Warsan:** Ma sahlana agaasimka iyo ka mira dhallinta tacliin sare oo tayo le, haddaan dowlad ama dhaqaale buuranu jirin. Sideebeey idiinku suurowbeysay inaad soo saadhaan kaadir caafimaad oo tayo sare le, bulshadana lagu aamini karo?

**Dr Biday:** Takhaatiirta howshan soo bilowday oo dhamaantood barayaal ka noqday kulliyadda ayaa ahaa kaadiriin tayo le, dalka iyo dibaddana wax ku soo bartay inta aan sokeeye-warjeefku dhicin.

Aqoonta iyo waaya-aragnnimada barayaasha ayaa suurageliyey in loo saldhigo maamul iyo siyaasad waxbarasho oo soo saari kadha kaadir caafimaad oo tayo le. Jaangoyntaas siyaasadeed ayaa sidoo kale suuragelisay inaan isku duwnno qorshe dhaqaale oo lagu wado howsha. Dhaqaalaha ka soo xaroon karay ardayda ayaa qeyb ka ahaa qorshaa dhaqaale ee la dejiyey, oo bixinayey, welina bixiya qoondo lacageed oo lagu jaangooyey jeebka waalidka sabool u badan.

**Warsan:** Guddoomiye, waxa jira eedo bulshadu aad u hadal heyso, sida in ardyga lacagtu ku bar godo inta aanuu waxbashda dhameysan, albaabka ka xirataan, xattaa haddu yahay mid A+ iyo B+ aan hoos uga dhicin, maxaad ka leeday?

**Dr Biday:** Aadane ma eed la aado, caddeymo xaqiijiya in la keenaase laga maarmeyn. 13ka takhtar ee seeska u dhigay JB badankood, dhamaantoodba aan dhaho, waa khubaro saboolku kanshada siiyey, oo canshuur laga qaaday wax ku soo bartay, abaalgadayaalna maanaan noqon, oo inta karaankeenna ah wax badan baan saboolka ku celinnay, welina wadnaa. Waxase in la garto ah, in JB tahay hey'ad gaar loo leeyahay, dhaqaale ay wax ku waddana u baahan.

Ka warran haddaan gugiiba laba boql (200) arday oo saboolka ka yimaada tacliin bilaasha siinno. Ka warran arday kasta oo shil ku dhinta (qaraxyada u badi), waalidka, kii uu u joogo arday dugsi sare dhameeyey aan bilaash wax ku barnno. Ka warran waaliddiintii ku shahiiday dhacdadii shaamow ardadii ay dhaleen ee JB ku jirtay inay bilaash ku dhameysteen. Ma nihin dad damac xoolo-uruursi hoggaamiyo. Noo kaalay aad markhaati ka ahaatid warcelintane.

**Warsan:** Guddoomiye, Dad baa qaba in ardaygu yahay ka jaangooya siyaasadda jaamacadda iyo (guud ahaan kuwa idin la mida) kol haddii ardaygu yahay isha dhaqaalaha jaamacadda, shaaaddo aanuu u qalminna siisaan, ma leydinku nabayaa?

**Dr Biday:** Malaha qaarkii waa dambi, warna in la hubiyo kama maarmo inta aan la qeybin. Ma jiro arday JB aqbasho, hadduu jiro, waa mid maray tijaabooyin badan, sharciga aqbalaadda JB-na ka gudbay. Waa been dhoodhooba, JB kama baxdo shahaaddo aanad mudan, mid wadadaa soo tijaabiyey ma aragteen? Haa, laakin guul kalama dheelman. Haddiiba shahaaddooyinka JB yihin kuwa dadaal li' iyo mudnaan la'aan lagu qaato, ardada aan soo saarnnay kama soo muuqddeen goobaha shaqada dalkeenna, jaamacadaha iyo hey'adaha caalamigaa ee dunida.

Eeg Bogga 10

Ka yimid Bogga 11

Bal tag isbitaalka Urdogaan (ex Digfeer) qeybta cudurrada wadnaha-waxad u arki madaxa qeybta Dr Cabdinaafic M. Xuseen iyo Dr Xaliima Cabdulqaadir Axmed, oo labaduba ah kaadiriin aan juhdi soo gelinnay, maantana u faa'ideeya bulshadeenna. Haa, waa nabid!

**Warsan:** Baahida idanku aannad weli daboolin iyo waxa aad jeclaan laheyd in wasaarada waxbarashada iyo tacliinta sare sameyso, si hore loogu dhigo waxbarashada dalka.

**Dr Biday:** Weli sidii aan rabnnay maaha qalabka, goobaha tabarrada iyo degaamada kulliyadaha JB. Wasaaradda waxa muhiima inay dhameystirto sharciyada iyo siyaasadda guud ee waxbarashada. Wasiirka si gaara, waxan uga codsan lahaa inuu dhallinta aan waxbarashada asaasigaa helin ama jaamacadaha geli kari weyday inuu dadaal geliyo sidii loogu heli lahaa dugsiyo farsamo, oo hubaal dalku aad ugu baahan yahay.

**Warsan:** Maalgelin haddaad hesho, mudnaanta kowaad mashruucee kuu ah?

**Dr Biday:** Xarun cilmi-baariseed, maktabad, isbitaal dhameystiran iyo beero.

**Warsan:** Mahadsanid

**Dr Biday:** Soo dhowow

## Tiro ka mida aqoon-yahanka ka soo sahay qaatay jaamacadda Banaadir, door muglena uga jira adeegga bulshada iyo dunida kale waxa ka mida:



**Bismillah**,

Magacaygu waa Dr Cabdinafic Maxamud Xuseen, galay kulliydda caafimaadka jaamacada Benadir gugiii 2010kii, qeybtii 9aad, shahaadada kowaad waxan qaatay gugii 2016kii.

Bilawga gugii 2018kii, waxaan bilaabay tababar aqoon-kororsi dhinaca qalliinka wadnaha iyo xidadada oo aan ku kala qaatay labada isbitaal ee Mogadishu Somali Turk Hospital (Ex digfeer) iyo Isbitaalka Dr-Siyami Ersek, Istanbul Türkiye. Aqoon-kororsigaa gugii 2023dii ayaan dhameeyey, anoo ku biiray takhaatiirta ku xeeldheer la tacaalidda cudurradda haleela wadnaha iyo xid获ada oo naadir ku ah dalka..

Takhasuska, kadib waxaan isku howllay in waddanku helo xarun cudurrada wadnaha la tacaasha oo aan hore dalka uga jirin (Cardiac Surgery Centre). Xaruntaasi, hadda waxay suurta gelisaa in wadanka ka samayno qaliinka furan ee wadnaha, markii ugu horaysay taariikhda caafimaadka Somaaliya. Turkiga ayaa naga saacida gudasha howsha muhiimka u ah bulshaadeenna.

Waxaan sameeyay cilmibaarisyo badan oo la xariira xaafimaadka wadnaha iyo xidada kuwaas oo aan ku daabacnay wargesyo caalami ah.

. Xaruntu shacabka iyo qarankaba waxay u badbaadisay naf iyo maalba badan, waayo qeybta qallinka wadnaha inta aan la hirgelin hanti badan ayaa dalka iyo shacabkaba uga lumi jirtay isbitaallada dibadda oo weliba qaarkood aan adeeg fiican bixin karin. Hantidaas maanta wey baaqatay, waxayna ku hadhay khasnnada shacabka iyo qaranka.

Waxaan u mahadcelinayaa hoggaanka JB oo aragti ay lahaayeen lagu yaqleelay JB-da maanta aniga iyo qaar kaloo badan soo saadhay. Waxan ku talinayaa in ardada Soomaaliyeed waddankooda wax ku bartaan, waxbarashada sarena la dhiirrigeliyo.

**Dr Cabdinafic Maxamud Xuseen**



**Bismillah,**

Magaceygu waa **Dr Xaliima Cabdulqaadir Axmed**, waxan ka mid ahaa ardadii ka qalin jebisay Jaamacadda Banaadir gugu markuu ahaa 2011kii, shahadada kowaad waxan ku qaatay cilmiga (anesthesiology), sarkaalka labaadna waa ka ahay qeybta, isbitaalka Ordugaan. Waxan ahay xeel dheere agaasimta bukaannada qalliinka u baahaan una diyaariya tallaabada xigta sidii ay u guuleysan lahed oo qalliinka ah. Waxan u sameynaa xanuun-ilowsiin ka saacidda inuusan qofku dareemin xanuunka ba'an ee sugaya, hubinnaa bad-qabkiisa, lana soconna xaaladdiida qalliinka kadib..

Jaamacadda Banaadir maahan oo kaliye dugsi cilmiga caafimaadka igu hubeeyeye, waa macallinka igu soo ababiyey sidan u wajahi lahaa nolosha iyo dabeecadaha dadka, maadaama shaqadeydu tahay mid aad u xasaasiya, daqiiqad walbana na la kulmineysa wax kaa yaabiya, la murugooto, gaar ahaan kuwa aannad waxba ka qaban karin. Alle ka soke, mahad baan u celinayaa danjirayaasha, maamulka iyo si gaara macallimiinta JB oo juhdi badan na geliyey, gooro waqtigu adkaa. Alla ha idin xafido



**Bismillah**,

**Shirwac Cabdullahi Ibrahim**, waxaan ku faanayaa inaan ka mid ahaa ardadii faraha badnayd ee wax ku baratay Jaamacadda Banaadir. Kulliyadda waxbarashda qeybta (Bio/chemistry) ayaan galay gugii 2004tii, shahaadada kowaadna waxa gacanta ley geliyey gugii 2008dii.

Shahaadada darajada labaad (Masters), waxan ka qaatay (Jomo Kenyatta University), cilmiga hoggaaminta iyo maamulka gugii 2019kii. Mudda dheer ayaan macallin iyo maamule ka soo ahaa dugsiyada dalka, aqoontii JB aan helayna, waxan uga faa'ideeyey da'a yar badan oo ku jira ama ka baxay dugsiyada dalka. JB, waa daaqaddii aan ka soo galay dunida maanta aan dhex dabbaalanaayo.

Waa halkii leygu soo baray sida aan nolosha uga jibba keeni lahaa, mid naftiisa, dadkiisa iyo dalkiisa waxtar u yeeshana u ahaan lahaa. Ma garanaayo, waxan maanta ahaan lahaa haddii aanan fursad waxbarsho ka helin JB. Hadda waxan sii-hayaha ka ahay Safaaraddeenna dalka Bakistaan. Waa ku faanayaa inaan JB ka soo mid ahaa, mahadda kowwaad Allaa le, ta labaadna waxan u diyaa maamulka, macallimiinta iyo bahdii wadada ardaynnimada ila soo qaadday.



**Dr Yoonis Cali Faarax**, mid ka mida ardadii ka badbaaday musiibadii hotel Shaamo xafladdii qalin jebinteenna gugu markuu ahaa 2009kii. Shahadadii aan ka qaatay jaamacadda wadnaheyga aan ka bixin ee JB, waxay beenisay naxli la buunbuuniyey ee ahaa in dunidu aayan aqbaleyn shahaaddo Somaaliya jaamacado ku yaal bixiyaan. JB ayum baaan u hadli karaa oon shahaadadeeda wataaye, waxa u dhoofay qaarradda Yurub, Allana waxa uu i saldhigay dalka Iswiddin.

Aqoon kororsi baan u raasaday mid ka mida jaamacadaha loogu jecel yahay dalkan-waa jaamacadda (Linköping university) anoo ku hubysan shahaadadii aan ka qaatay JB-da barbaarinteyda door weyn kule, oo Alle iyo waalidkey ka soke, magaceyga ku dartay liiska dadka loogu jecel yahay, looguna baahi badan yahay dunida. Shahaadadeyda horta, waa la aqoonsaday, halkaane leygama harine, waxa ley diray tijaabo loo qabtay 120 takhtar oo isaga yimi dunida badankeed.

Ka warran haddii 17ka takhtar ay tijaabadii gudubtay, arday JB soo hubeysayna ka mid ahaa? Tani, tusaale cad bey u tahay in JB ka tayo iyo adeeg fiican tahay jaamacado heysta wax kastoo sahli lahaa, in jaamacadi tayo ku faanto. Cidina JB uma diidi kadho inay bandhigto tayo waxbasho oo dunida hore martay aan ka sokeyn, markhaatiguna waa "aniga" iyo qaar kaloo badan. Mahadi ha gaadho hoggaanka, maamulka iyo macallimiintii juhdigan guuleystay i geliyey.

Hadda waxaan ka shaqeeyaa Hospitalka ugu weyn gobolka Dalarna ee Sweden.



**Dr Cabdulqaadir Xassan Axmed**

Macaanka, qiimaha iyo waxtarka aqoontu leedahay iima daadegin illaa aan isu diiwaaniyey tacliinta sare. Waxan ka mid noqday koox dhallinyara ah oo doorатay inay ku safraan waddo geysa ceelka looga oon baxo cilmiga iyo dhismaha kombuutarka (computer science). Waxan gaarnnay ceel biya macaan, gurisna aan looga shaki qabin. Ceelkaas, waa jaamacadda Banaadir (JB).

Waa iska diiwaangeliyey, anoo durba ku carraabay waddo dheer, haseyeeshee aan ku kalsoonsanaa inaan maalin uun jeeniga ku qaadi doona aqoon iga gacan siisa u babac-dhiggidda nolosha dunidan aadka u adag, labada-daraale ta ay la nooshahay ummadda aan u nasab sheegto -Somalida. Waxa ii muuqatay xilka igu soo aaddani inuu yahay mid culus oo iiga baahan inaan isu hubeeyo.

Gugii markuu ahaa 2006kii, oo cidda xusuusataa ay garan kadho xaaladda Muqdishu ceynka ay aheyd iyo sida qof ugu fekeri karay inuu waxbarasho galo iyo cidda arday qaabili kadhay, waxna bari kadhay (dagaalladii Itoobiya Xamar ku qaaden, 2006dii). Jaamacadda Banaadir oo ay ka go'neyda inay waxbarashadu socoto qiima kasta ha ku kacdee ayaan iska diiwaan geliyey kulliyadda (computer science and information technology). Afar gu kadib, 2010kii ayaan kala booday shahaada hore. Kaaliye bare iyo madaxa sheybaarka kombuutarka JBna waa leyga shaqaaleeyey. Halkaa iigamey harin JBiiye, waxa ley dalacsiyey agaasimaha dugsiga daraasaadka sare, shahaadadeyda labaad kadib. Macaanka, qiimaha iyo waxtarka aqoonta oo aan markaan dhadhamiyey ayaa tiri: maxaannad PhD ugu dareyn? Turkiga ayaan iyana kala soo noqday, anoo ku xeeldheer handasada kombuutarka.

Ma ku filla jaamacadda Banaadir inaan iraado "mahadsanidiin" waayo abaalka ii galay, ka qara weyn "mahadsanidiin" abaal aan gudi karayona maba aha, waxanse leeyahay JBiiyey sida aan hooyo iyo aabe abaalkooda u gudi karin, baan kiinana u gudi karina, qalbigaanse boos aannad ka guurin idinka siiyey intaa uu nuuxsanaayo.

**WQ: Tifatira**

A Global, Modern and Sustainable Trade Hub

Great Horn Investment Holding

Djibouti Ports & Free Zones Authority









P.O. Box 197, Djibouti, Republic of Djibouti

T: +253 21 35 90 70  F: +253 21 35 90 59  E: info@dpfza.gov.dj


# SEBENKA LAFA LABA GOD LEYSU WEYDAARIYEY IYO MUWAADIN CADOW LOO GACAN GELIYEY SINMEEN!

Seben ayaa na maraya aan kala sooci la'nahay xumaha iyo wanaagga, seben ayaa na maraya waxyagu na la xun yihiin, seben ayaa na maraya xinjirtu qubaneyso, seben ayaa na maraya inba meel goostay, seben ayaa na maraya shisheeyuhu noo garqaado ,seben ayaa na maraya in aamustay iyo in waalli hadasha u qeybsannay, seben ayaa na maraya Somaalinnimadu ceeb tahay. In sebenka noocan ahi marti noo yahay, waxad tusma u ah bulshada qeybahii loo fakan jiray waqtiyada aafooyinka oo waranka kilkilaya.

**Saddxda loo fakan jiray:**

A) Culumada (diin iyo maaddiba) : Culimadii diinta waa ku qeybsantay, koox kooxna wey isugu uruureen, tu walibana anaa saxa bey bulshadii kula dhex orodday, magacyada lama tiri karo, adigu isku day. Caamadii xaalkeed, **waa hal nin gurrani tumay dhanna uma fayooba.** Aqoonyahanka hoggaan haya waxba lagu soo gaari maayo, waa arkaa qaad aan waxba reebin (mid fiican billa la heli karee), xilkii tamashle iyo dalxiis buu u adeegsadaa. Qaranka iyo dadka uu xilka sido, waxa uu ku maaweeliyaa "had a fruitful discussion with the donors today" Waa Shirar lugooyo iyo mashquulin qorshahoodu yahay oy maleegaan shisheeye doonaaya dhanna inaan loo dhaqaaqin.

B) Maalqabeenka: Diiwaankiisa waxa yaal wax kastuu ka xooleystay boqolkiiba 70% inay yihiin wax dadka u daran, dawada iyo cuntaduba ha ugu badnaadeene. Dhinca kale, aadanahani- (waa maalqabeenkee) diiwaankiisa kumaba uusan qorin inuu xoolahiisa kula tacaalo xal u helidda mushkiladaha bulshadiisa, sida maalgelinta, dhisidda, gacantiinta hoggaamin daacada, saboolka, qurxinta magaalooyinka iyo qeyb qaadashada goobaha adeegga bulshada (Isbitaallada, iskuullada, warshadaha shaqo u abuuri kara dhallinta). Ma lagu hayaa, waa fara ku tiris, armuuba dhibta qeyb ka yahay.

C) Dhallinta: Iyagu waa xaabo la shito. Odoy-dhaqameed iyo siyaasi ayaa adeegsada oo dagaalka afka iyo qoriba u dirsada. Dhallintu haddey su'aashan hordhigi lahaayeen kuwa dirsada: "waxan aad ii direyso danteyda, iyo ta waddanka xaggey iska waafaqayaaan?), labadan daneyste, dhibta ay nagu hayaan, maanaan dugsaneen.

Hab-dhaqanka aan waxba la rodlineyn, dabeecadaha aadana dadka u kuurgala waallida dhaqanta ayey xijiyaan, badanaana culeys maskaxda fuula oo isna dabada ku haya, dhibaha bulshooyinka aan ka degin, waqtina socda, sida dagaallada sokeeye doxa ayaa loo aaneeyaa. Kweenna aadka ugu fiirsada bulshadeenna iyo dabeecada silloon ee sebenkan lagu arko, waa u muuqataa in belada hooyadeed waalli tahay.

Bal daawo siyaasigeenna marka uu kursi rabo dambaabura ka daata, **"reer hebel haddaan nahay ama sharciga dalka lagu xad gudbay"**- waa laba

Eeg Bogga 16

Ka yimid Bogga 15



Lafaha iyo eeddo la buunbuuniyey

aanuu weligii laba dhagax isu saarin.

U fiirdo culimadeena sebenkan, iyagaa isku lusha, u fadwooda ka ay u arkaan inuu dadka fahamka diinta ka dhisaayo, iyagana ugu yeeraya dood-cilmiyeed-diini ah oo lagu kala baxo, bulshadan caamada u bandanna mid ay gaaleysiin iyo dil u fadwoodeen ka dhigay. Marka uu jeedinaayo duruus diiniya, dembiyo bulshadu ka dhaqmi kadho ayuu kula meereesataa, kuwa diinta iyo jiritaanka halista ku ahna, oodda ayuu ka jiita- {will dhoor le, gabadh diraca kor u heysa) ayuu waqti badan ku lumiyaa}.

Xanuunka oo mid cid walla-ba halkeed ugu tegay, haddana halka uu cardaadiqaha ka dhigay waa siyaasadda. Mid tolkii ka ridayey gar lagu naqay, mid iyagaahuna u soo qaaday, ayaa xigmaddan reebay, **"hebel waa noo dhalaaye, nooma dhaho"**. Horweynta siyaasadda dalkaan hoggaankiisa iska beddesha oo koox is taqaanna ah, wey ku hor guuldareysteen bulshadooda, waayoo waxay ka duween siyaasadda wadiiqadii xalka dhibta, tiii xooleysiga, tamashlaha iyo dalxiiskana waa ku rideen.

Haddii mid yabyabis isku dayo, waa ka Eey cambaarle noqda, leyskana lulo waabariga iyo gabbal dhaca illa muddadu ka dhamaato isagoon laba dhagax shamiita yar u dhaxeysiin. Bulshada iyadu, waa in aamustay iyo kuwa siyaasiga u kala safan, dan guud iyo mid qaranna soo qaadin. Sebenkan ma kala sooci karro runta iyo beenta, sax iyo khaladka, xaqqa iyo baadil. Waa isku yaac, wax walba halkoodii laga leexiyey.

Toddobaadadii naga tegay, baraha bulshada dhacdo dad dano gaara u ololeeya ay aad buunnyeen ayaa la walfinayey. Waa lafa laba qod leysu wedaaarinayo. Kaaga daranta waxa geed dheer iyo hooseba u fuulay sidi loogu ekeysiin jariimo qaran oo lagu dhacay, masuuliyaddana dhabarka madaxweynaha hadda lagu rarayey. Madaxweynaha iyo xafiiska uu hayo magac kasta oo xun ayaa lagu hardhay.




Qalbi iyo kuwii loo dhiibay

Kuwa walfinaaya waxay garan waayeen in xafiiska iyo madaxweynuhu isku yahay mid sharfkoodii sida oo ka mudan in la sharfaan, dhaliilahana la qofeyn. Haddaad madaxweynaha caydo, garo, waa xafiiska sharfkaada sida oo shisheeye iyo sokeeyaba ku hor ceebeyneyso. Sokeeyaha aan waalidu gaarin iyo shisheeyaha hadduu rabo cadow shacabka ha ahaadee, waxad u ahaan mid is-nuugaya, aboodiga ukumihiisa dib u cunaynna ku weela. Maaha inaaney dowladda hadda joogta laheyn dhaliilo, haa, wey leedahay, hayeeshee, fasaxi meyso in xafiiska iyo madxweynaha in waxba loo hambeyn waayo. Waxa toosi, adoon gafaf geysan. Markaad xun gole tahay, gee golaha, halkaana ku ciyaar.

Magac-dilkan xadka laga gudbiyey, door weyn waxa kule laba masuul oo mid xubin golaha shacabka yahay, ka kalana guyaal soo maamulay sirta qaranka.Kaaga daranta, waxay labadu gacanta midig iyo ta bixi u kala ahaayeen madaxweyne ku dhiiday in muwaadin Somaaliyeed oo weliba ka soo mid ahaa xogga dalka loo dhiibo cadow uu muddo la soo dagaalamayey, daqiiqadna looma keydin labadooda meel ay uga soo horjeesteen dhacdada, kolkaa haddii ay maanta walaalaheen na leeyhiin lafa laba qabri loo kala beddelayey (ujeedadu tey doonta ha ahaatee) ayaa qaranka uga waxyeello weyn dhiibista muwaadinkeeda sebenkaa na dhaxlsiiyey.


# YAA IDHI XAFIISKA RA'IISAL- WASAARAHAA KU YAAL SAFAARADDA TURKIGA!


RW-re ku-xigeenka xukuumadda


Wasiirka diinta


Wasiirka Amniga Gudaha


Wasiirka waxbarashda


Wasiirka macdanta


Wasiirka gaashaandhigga


Wasiirka caddaaladda



Waiirka dekadaha


Wasiirka caafimaadka

Waxa isku duway: Waddani ka welwelsan umuurta, farriinna diraaya!

WARSAN
WACYI-GELIN | TOOSIN | DHISID

Haddaannad Warsan ku Arag
Meel Kale Ha Ka Doonin




WAXA LAGA HELIKARAA:

Nabaad Supermarket (Shaqaalaha), National Book Centre (Km4) | Universal Bookshop (Hargeysa) | Al-Risaala Bookshop (Bossosa)

www.thewarsan.com

# BULSHO WAX WALBA AQBASHA HIIRAAN KOW

## SALLAANKA DANTA GAARA MAXAANAD U TUUREYN?



Ugaas Yusuf Ugaas Hasan Ugaas Khaliif

In la midoobo talo fiican bey aheyd, cudud dhaqaale iyo mid bulsho baa ka dhalan kara, haddii si fiican loo maareeyo. Waxay aheyd in arrimaha dhiinacyo badan laga darso, xisaabtan dhabana wax lagu kala goosto, si sheegasho dambe looga hortago.

Beledweyne iyo Jowhaar, si aan ka fiirsi badan laheyn ayaa lagu mideeyey gugii 2016kii, madaxweynihii ugu horreyeyna xilka waxa uu hayey wax sannad ka yar. Labada gobol, waa dhul qaniimo Alla ku galladay, muhimad dhuleedna le.

Hiiraan waxa la qiyaasay xoolaha jooga inay gaarayaan 3 milyan oo neef, oo kuwa la dhaqdo ah. Duur joogta cidna ma tirin. Dhul-beereed tacabka ku fiican iyo webi aan gurin oo joogto u waraabiya dadka, xoolaha iyo dhulkaba Alla waa ugu daray. Hiiraan halka uu dhaco, waxay ka dhigtay meel halbowle u ah ganacsiga, isku xirka gobollada dalka iyo jaarka.

> “nin gurrani hal uu tumay dhanna uma fayooba”

Sh/dhexe, muhimaddeeda dhaqaale astaan waxa u ah inay nasiib u heshay in laga dhiso magaalo-madaxdeeda warshaddii ugu horreysay nooceeda Afrika oo dhan deyrtii 1929kii. Dhul-beereedka qasabku ka bixi jiray bedkiisa, waxa lagu sheegay 100-150km oo isku wareega. Xoolaha iyo wax soo saarka beeraha cid ku heysata waa dhif. Gugu markuu ahaa1963-4, waxa la geed-qaaday dhul—beereed baaxadle oo Shiinuhu ka beereen bari-is, Somaaliya aan hore looga beerin. Maanta waa gobolka

Eeg Bogga 22

Ka yimid Bogga 21




Agaasimaha Nabadsugidda Qaranka

dhinaca bariiska ugu wax soo saar badan. Badda ayuu qeyb mugle ka heystaa oo siineysa muhimad kaloo gaara.

Gobollada qaniimadaa le, dadkoodana lagu qiyaasay 3-4 milyan oo qof ayaa maanta macluul dugsada oo saf-dhaadheer ugu jira raajin waqtigii la quudan lahaa kadib maray oo WFP u qeybiso. Waa hey'ad wacad ku madhay inaanu kobcin wax soo saarka gudahu, seexisana kuwa danaha gaarka ah ilaashada ee loo diro inay ka badbaadiyaan dadka, dhiirrigeliyaanna beeraleyda.

Hirshabeelle, gugii 2016kii ayaa madaxweynihii ugu horeeyey loo caleema saaray, wax ka yar gu kadibna albaabka ayaa farta loogu fiiqay. Waa Cali Cabdulaahi Cosoblee, mar uu hadlay kadib ridistiisii, waxa uu eedda huwiyey Ra'iisal-wasaarihii isna xafiiska laga ceeriyey ee Xasan Cali Kheyrre. Sebtambar, 2017kii ayaa madaxweyne kale loo doortay H/shabeelle, 4 lab gu/deyrood oo uu xilka hayey laba dhagax oo uu isi-saaray lagama dhaxlin, markii uu xilka ka tegay Noofembar 2020kii. Ogow labadu waa reer Hiirane.

Dowllad-goboleedka Hirshabeelle, waxa hadda xilka haya madaxweyne-ku-xigeenkii labadaa madaxweyne ee kor ku xusan- Waa Cali Cabdulaahi Xuseen (Guudlaawe).

Guudlaawe, waxa uu dhaxlay "nin gurrani hal uu tumay dhanna uma fayooba" dowlad-goboleed looga tilmaan qaadan karo, hayeeshee, isaga waxa la soo gudboonaaday oo mushkiladahaa u raacay kacddoon shacab oo ka soo burqaday gobolka Hiiraan ee la midoobay Sh/dhexe oo uu Guudlaawe ka soo jeedo, sababtana waxa loo aaneeyey doorashada sidii loo maareeyey iyo cabashooyin wax qabasho la'aan salka ku haya.

Haddii Guudlaawe shacabka Hiiraan ku eedeynayaan madaxweyne maxuu u noqday? Ma qabato. Waxa habboon in reer Hiiraan is-weydiiyaan sababta ay ku waaayeen madaxtooyada? Labada madaxweyne ee hore, waxay ka yimaaddeen Hiiraan, waana waqtigaa, waqtigii dhibaatooyinka ugu ba'ani soo mareen maamul-xumo halkii ugu hooseeysay oo gobolka joogto u aheyd awgeed.

Shacabka inay adeeg waxbarasho, caafimaad, amni iyo horumar helaan bey aheyd, madaweyneyaashii gobolka ka soo jeeday haddey intaa horseedi waayeen, eeddu Guudlaawe xaggey ka qaban. Ta kale, Guudlaawe, horumarka uu ka sameyn waayey Sh/dhex, sideebey Hiiraan uga filataa? Bal eeg Jowhar, waa magaalo weligeed laba dhagax leysu raarin.

Haa, hubaal Guudlaawe, hoggaamin lama imaan, lamana imaan karo, nikeediiba maaha, iskumana deyin inuu xusho aqoon-yahanno ka caawiya in wax uun loo yabyabo reer jowhar, Beledweyne inta aan la gaarin. Yaase arkay cid Guudlaawe dhaanta oo Hiiraan joogta. Kuwa isaga dambeeyey maamulka, waa qolo mid mid dhaama aan Meesha la keenin oo habeenkii soo jeeda, maalitiina hurda, isbaaradana quuta.

Haddii xaalku sidaa yahay, kacddoonka Hiraan dadka hoggaaminaya, oo hadda laba soo kala jeedda ah, waa inay waaqaca wajahaan, dhudhumiyaan waxa u suuroobi kara, kacddoonka waxa u fuli kara, kanshada loo heysto in Hiiraan dowlad-goboleed u gaara dhisan karo iyo jid-gooyada go'is lagala kulmi karo.

Dhaqdhaqaaqa dib u heeshiis ee uu waday boqor Yusuf boqor Xasan, tilaabo dhinaca midnnimada loo qaaday waaye, haddey hana qaaddo, waana wadada lagu xaqiin karo hadaf kasta ee reer Hiiraan doonaan inay hirgashadaan, haddeyse ku socoto sida hadda wax yihiin hadaf la riixi karayaa ma jiraayo. Dadku maaha inay sallaanka danta gaara lagu gaaro aqbalaan maaha.

Dawada dhibaha is-tuksan ee Hiiran xalkooda, waxa laga dhex helayey haddii cid la fulisa la helo, hadalkii agaasimaha sirdoonka qaranku ka jeediyey shirkii bulshada Hiiran mid ka mida uga socday Maxaas, bishii Juune ee tegtay. Hadalka agaasimaha oo loo dirayey mid ka mida beelaha Hiiraan dega, dhabarkana loogu xidho dhibaha gobolka, nuxurku wuxuu ahaa, xigasho: **"runta aan isu sheegnno, ka dhibka wada aan qabanno, hebel garle, ka kalana leda aan joojinno, caddaalad aan u saldhignno, Hiiraanna midnnimo horseed aan ugu ahaanno".**

Majalladani, waxay soo jeedineysaa, in inta dib loo dhigto dowlad-goboleedyan lala kala ordaayo ee waaca ka fog, bulshadana dhibta ku sii fogeynaya in reer Hiiraan wadahadal waaqacaa-ku fadhiya la galaan federaalka, miiskana saaraan caddeymo biya kama dhibcaana oo waxa ay doonayaan lagu bayaamiyey.

Lama rabo kor ka xaadin aan gadmeyn ama qormo ay qoraan dad aan ehel u aheyn waxa laga hadlaayo. Waa in leysku duwa guddi aqoon-yahanna ah, laamaha cilmigana ku xeeldheeraaday oo diraaya warbixin qancin kadha , kana gadanta Federaarka iyo caalamka dana kule Somaaliya iyo gaar ahaan Hiiran.

Dowlad-goboleed haddii la ogaansanayo, dooddeeda saldhiga iyo tixraac waa in looga dhigo dikareetadii rasmiga aheyd ee uu madaxweyne Shariif Sheekh Axmed laba gobol uga dhigay Hiiraan. Lama rabo iyadoo qallan in lala soo cararo, waa in lagu soo lifaaqo, sharciyada gobolka siinaaya inuu astaahilo in loo dhaqan geliyo faafinta rasmiga ee madaxweynaha. Wixii ka sokeeya waa riyo iyo silican dadka lagu hayo.

**WQ: Nur Cilmi**

# Axmed madoobe goormuu garan doonaa inuu dhul barwaaqo, omos u beddelay, muuse dabaqa bateeyo haddii wax hareen?

Sidan ayuu ahaa



Haddana waa kan-goormaa la xisaabt-ami doonaa?



Hoggaamiye Axmed Islam



Kismaayaan ka dhoofineynaa!



Kuwan (KDF) ayaa looga faa'ideeyaa, kuwii lahaana xe-ryahaa tuugsaa la baday!



Goormuuu Axmed dareemi doono inuu horseed ka yahay, dhul saxaraha inuu dhaxal- siinaayo jiilas-ha soo aaddan. Axmed nin culuma ah weeye, kitaabka Allana wax badan bowsaday, lagama filey inuu

Eeg Bogga 26

Ka yimid Bogga 25

tacadiga muggaa le raalli ka noqonaayo, waayo dhirta noola aadane iyo xoolaba le ayaa nolol ka hela.

Duur joogtii dhuulkaa camiri jirdhay, maanta xabadi kama joogto, aadana degan badankooda oo Axmed u nasab-sheegto wey ka qaxeen, haddii cid ku hadhay jirtana oon iyo daaq la'aan baa gondaha u taal.

Qofka nasiib u hela inuu Axmed la fariisto, waxa hor imaanaya qof u eg inay aad u dhibto dhibaatada Somaalida heysata guud iyo ta lixaadka le ee taal halka uu maamulo, awood uu isbeddel ku keeno haddu heyn lahaa, xaalku sida uu yahay uusan ahaadeen. Isma qabataduse waxay tahay, taa uu hayo muu adeegsado, oo ugu yaraan dekadda ka joojiyo in jawaan dhuxuli ka dhoofto.

Axmed, waxa la gudboon inta uu weli nafta hayo, inuu dabaqateeyo xoorka haray, haddiiba wax ka sii nool yihiin. Xusuuso waalkeyow aayadda le "mid kastoo raaca ah, wixii la raaciyey isagaa xil ka saran yahay". Alla ha ku duwo.

**WQ: Muwaadin ka xun waxyeellada**

# Somaalidu in dad kale maamulo ayey jeceshahay



Soomaalidu waa talo qaadatee ee talo keennayaal maaha, Soomaalidu waa dad la hogaamiyo ee dad wax hogaamin kara maaha, Soomaalidu waxa ay soo minguuriyaan mooyee wax ma curiyaan, haddii aad doodaasi igu diidan tahay, ma sheegi kartaa wax ay sameeyeen oo dalalka jaarku kaga daydeen ama caalam kale u gudbay, imisa aragtiyood ayaad garanaysaa Soomaalidu ka soo xaday dalalka ay tageen oo dalkooddii ka hirgaliyeen.

Si aad iigu markhaati furtid, waxaan hortaada keeni doonaa tusaalooyin marag u ah in Soomaalida lagu guuro oo cidii dan lihi adeegsato.

Culimadeenna cid diinta ka taqaanaa ma jirto, hadana waxay u dabran yihiin culimada Carabta joogtaa, wali maad aragtay wadaad Soomaali ah oo buug ka qoray aqoonta diinta uu u leeyahay, wali ma aragtay wadaad qaraar diinnaya ka soo saaraya xaalad taagan, balse intaasba Carabta waad ka helaysa, wadaadka Masar, ama Suudiga ama Suudaan buugaag waaweyn buu leeyahay oo la odhanaya waa kutubtii hebel. Waxay go'aamo diinnaya ka soo saaraan hadba waxa taagan ee dadka tushuush galin kara, balse wadaadkeenu cabsi uun baa ku jirta, waxaana laga yaabaa inuu isagu ka aqoon badan yahay wadaadkaasi Carabka ah.

Xaga aqoonyahanka maadiga aan eegno iyagana:

Wali maad aragtay aqoonyahan xafiis loo dhiibay ama xil loo dhiibay oo wasaaradda ku dabaqaya wixii uu soo bartay ama ku soo shaqeeyey, laakiin hadii uu gaal xukumaayo qodob ma jabinaayo waayo wuu sharfayaa. Haddii eray Ingiriisa ah uu kaa khaldamo wuu kula yaabayaa, waayo agtiisa ceeb weyn bay ka tahay, balse hadii uu afkiisa Soomaaliga ah la khaldo waa caadi wax weyn uma arko, waayo gaalkaan ku odhan waa wax weyn.

Imisaad aragtay aqoonyahan **UN, EU, NGO** caalami ah ka soo shaqeeyey, balse markii uu dalkiisa yimid ee loo dhiibay xil dawladeed ku fashilmay, sababtu waa maxay ?. Xafiiska hay'addu qorshe la raaco ayey leedahay maalintiina shaqo maalinle ah oo xisaabi daba socoto ayuu leeyahay, nasiibdarro nidaamkaasi wanaagsan halkii uu dalkiisa uga faa'iidayn lahaa ee ay ka muuqan lahayd xafiiskiisa ayuuba intii jirtay uga sii darayaa oo uu maqluub ka dhigaya xafiiskii iyo wax uu isagu leeyahay, ninkuba ninkii maaha.

Bal hal qof sheeg oo dalalka horumaray ka soo shaqeeyey ama hay'adaha caalamiga oo meeshii loo dhiibay wax ka dhigay amaba u yara dhoweeyey meeshii uu ka yimid. Ma jirto mana soo heli kartid, waayoo wuxuu u haystaa in shaqadaasi uu gaalkaasi lahaa balse kan uu u madax banaan yahay, marka miyeyna ahayn gaalka uun buu ka baqayee wax hagaaji ismuu lahayn, waayo bariiskiisa uun baa ka gallay, aqoonyahanka Soomaalidu waa caynkaas.

Haddaba, wadankeena cid walba waa lagu soo tijaabiyey. Aqoonyahan waa la soo tijaabiyey way ku fashilmeen, odayaal waa loo dhiibay way ku fashilmeen, wadaado waa la soo tijaabiyey , fashilmeen, dhallinyaro waa loo dhiibo way ku fashilmeen, haweena sidoo kale fashilmeen, hadaba yaa hadhay?.

Waxa hadhay oo qudha dadka miyiga ku nool ee xoolo dhaqata ah, kuwaas iyana mar ha lagu eego inay kuwii hore dhaami doonaan baan filayaaye, waayo lixddan sanno oo waaliya, oo dawlad xumo ah ayey ku jirnnay.

**WQ: Barkhad-ladiif M. Cumar**

# Bare-sare Axmed Samatar Isagaa Dadka Is-nacsiiyey, Siyaasaddana ku Saaqiday

## Muqdisho iyo Hargeysaba

**Professor Axmed Samatar** waxa uu ka mid ahaa dadkii ka soo horjeeday gooni-isutaagga, madax-banaanida iyo dawladnnimada Somaliland,

Muddo 26 sano ah, wax kasta oo xun wuu



**Axmed I. Samatar**

Eeg Bogga 28

Ka yimid Bogga 27

kula dhaqmay. Hadaba markii uu madaxweyne isu sharaxay Muqdisho ee uu cod qudha waayay, ayuu cafis waydiistay xukuumadddii A.Siilaanyo.

Sidaa ayuu somaliland ku yimi, waxaana loo soo dhaweeyay si-dii geessi qaran gobol kasta oo dalka ka mid ah .

Aad ayay shacabka reer So-maliland ugu han weynaayeen , laakiin nasiib- ddaro, waxa uu ku biiray xisbigii kulmiye ee dulmiga badan geystay . Oo Professor Axmed Samatar ayaa qoray buugii barnaamijka xisbi-ga kulmiye doorashadii uu ku galay ee M.Biixi ku guulaystay 2017kii, madaxweyn- nimada ku helay .

Professor Axmed Samatar Biixi waxa uu u ballan qaaday inuu ka dhigaayo hadii uu guulaysto. In uu ka dhigo wasiirka arrimaha dibe-da, laakiin wuu ku ballan furay.

Professor Axmed Samatar ma ahayn qof u baahnaa in koo-to gobolka awdal loogu xid-ho, laakiin isagaa ayaa xisaab xumaystay oo isdilay, dadkiina isnacsiiyay. Siyaasadda ayaa ka qaldan tahay , aragti siyaasa-deed la'aan awgeed.

Waxa u banaanayd inaanu ku biirin xisbiga muxaafidka ama xisbiyada mucaaradka, ee uu dhex-dhexaad ka ahaado.

Maanta xisbigiisu, wuu soo bixi lahaa.

Madaxweyne Riyaal oo ay gobol ka soo wada jeedaan , waxa uu ka guulaystay doora-shadii madaxweyne ee 2003dii Axmed Siilaanyo oo qabiilkiisu 5 gobol degaan . Riyaale bar-naamij siyaasiya oo wax qabad ah ayuu la yimid, wuuna guu-laystay.

Maanta Professor Axmed Sa-matar waxa uu ku meeraysan-ayaa khilaaf abuuris iyo kooto ha loogu xidho gobolka Awdal xisbigayga, isago garab taagan keligii taliye la nacay.

Professor Axmed Samatar waxa u roon in uu siyaasada iskaga faddisto , kol hadii uu ku saaqi-day, oo uu maanta asqeysan yahay, kuna guul daraystay Muqdisho iyo hargeysaba .

Waxaan Professor-ka kula talin talaa, macalinnimadaada iyo muxaadarooyinkaaga , iskaga ekow oo siyaasada iskaga bax, waad ku saaqidaye.

**WQ: Cali Biixi**

# Ab-tirsataye ayaad tahay?




Soomaalidu waa qomiyad balaadhan oo degta gees-ka afrika,waa qoomiyada ugu deegaanka weyn qoomiyada afrikaanka ah, waxay deegaan ahaan ku fidsanyihiin bariga-afrika sidoo kale intii ka danbaysay dagaaladii ka bilowday kun iyo sagaal boqol iyo sidee-tamaadkii wadankii laysku odhan jirtay Soomaaliya waxay ku baaheen dunida dacaladeeda,taas oo hada aanay jirin dalalka aduunka ugu weyn ama magaca leh ee qaaradaha kala duwan kuyaala mid aanay soomaali degeneyn haday tahay yurub, ameerika ,aasiya,ustareeliya iyo afrikada ka durugsan deegaamada soomaalidaba.



Somaalidu waa qomiyad leh Af iyo dhaqan ay ka siman yihiin oo af-soomaali iyo dhaqan So-maali loo yaqaan, siddoo kale, Soomaalidu waxa ay isku gar-taan qabiilooyin ay u kala bax-aan taas oo ay isku tooyadaan iskuna tolaystaan abtirsiin ay oday ugu arooraan oo u Ab-tir-sadaan, hase yeeshee waxa aan jirin meel ama oday kulmiya oo ay Somaalidu kusoo wada arooraan, waxase dhacda in qa-biilada waaweyn ee Somaalida midiba meel ku arooro, haw badnaadaan sheekhakh Car-beede, hadana waxa la yaableh in aanay jirin qabiiladaa qabiil leh Carab-baanu nahay oo ku faanaaya kana faanaaya So-maalinimada. Waa cajiib!.

Hadaba qoomiyada Somaalida ah saddax arrimood ayaa kusoo kordhay ,

1- In qabiiladii sii sarifmeen oo sii kala fircameen siina kala fogaan-ayaan oo sida xaal u muuqdo mar hadii qabiilkii meel sare oo uu ku dhamaado lahayn, meel hoosana ku dhamaan maayoo, waa laf' jilib, jifo, qoys iyo bah oo xaalku intuu oday joogo waa sahal e kol haduu bah iyo islaan gaadho, waa halis waayo ba' hebla iyo ba'haha xinfiltankoodu ka daran qabiilo iskusoo bax-ay, waayo laba walaalo ahbaa gondaha is daraaya!,



Eeg Bogga 30

Ka yimid Bogga 29

2- In Somaalidii Ka hayaantay deegaankeedii oo ay dunida xushay iyaga oo xanbaarsan qabyaaladdii ,waxaana dhici doonta in qurbaha jiilaalka ku dhashay ee ku dhaqmay ay aakhirka asal doorsami doonaan, waayo koox kooxaysi qabiil ku dhisan ayaa qoomiyadnnimadii muquurinaaya.

3- In deegaamadii Somaalidu isbadeley oo xeyndaab xuduud caalami ah lagu wareejiyey oo dalal laga dhigay magacyo cusub leh dadkii degenaana ku abtirsada la yidhi oo Somaalinimada meeshaba laga saaray, sidda Jabuutiyan,Itoobiyan iyo kiiniyaati, oo waxa dhacaysa in hadii nin qoomiyada amxaarada ama qoomiyadaha kale ee itoobiya dega aad is af-dhaaftaan uu yaa itoobiyaanay yidhaahdo in mid qoomiyadda Somaalida ahi uu tantoobo kula soo tiigsado!, kiiniya iyo jabuutina sidoo kale,100 Sano dabadeed, hadaad Somaali baad tihiin ku tidhaahdo dagaal filo.

Hadaba, waxa maxaa xal ah ee in uun qoomiyadnnimada Somaalinimo lagu badbaadin karaa? Hadii Somaali qabyaaladii iska dayn weydey siduu illaahay yidhina u isticmaali weydey, waxaan soo jeedin lahaa bal Abtirsiinta aad ubadka baraysaan SOOMAALI ugu danbaysiiya oo bara ubadkiina in qabiilada Somaalidu, Soomaal SOOMAALI kuwada dhamaadaan kuna wada aroraan oo Somaalidu qoomiyad Oday SOOMAALI la odhan jirtay kasoo wada jeedaan,


Fadlan Abtirsiintiina SOOMAALI kuwada arooriya.

Anigu Fuad Fartaag Faratol Bade ................sheekh Isaxaaq aw SOOMAALI reer Shan-U-Roone-Soomaal Afrikaani, Qaabiil Aadan Ciid lagasamee abuur illaahay. (Reer Shan-u-Roone = reer Somaliland).

Bal hadaba ab-tirsataye ayaad tahay, anigu SOOMAALI dalkayguna Somaliland.

**WQ: Fuad Fartaag**

fartaagmuwaadin@gmail.com



# Caanaha samayska ah dhallaanka uma roonee ha xayeysiin




Iyadoo dalku leeyahay xoola qola lihi dhif tahay ayaa haddana suuq waxan u nahay caanaha, cuntada iyo daawada macmalka ah. Kaaga sii daranta warbaahinta qaranka iyo ta gaarka loo leeyhay ayaa waqti siiya lagu waaninayo dadku inay gataan caanaha sameyska ah ee suuqyaddeenna buux dhaafiyey, tayo darro iyo caafimaad xumana tuhun wyn looga qabo. Waayoo qaar badano iyaga lama yaqaanno sharikadaha soo saaray. Ganacsatadeenna la rabay inay dalka ka ilaaliyaan cunnada waxyeellada ku ah bulshadeenna. Intaaba kumey joogsane magacyadii hambalheenna ayey ku daabaceen, sii yoo dumarkeennu warshada caano leeyihiin. Nasiibdarrda weynise waa xayeysiinta qalabka warbaahintu la daba taagan tahay.

Wasaaradda caafimaadka iyo wasaaradda warfaafinta, waa inay joojiyaan xayaysiiska caanaha samayska ah oo aan loo baahnayn in laga dhiirigaliyo idaacadaha dalka halka caafimaad ahaan ay ka haboontahay in la dhiirrigaliyo naasnuujinta iyo caanaha xoolaheenna oo uga faa'ido badan dhismaha jirka dhallaanka. Waxa la ogaaday ilmaha la siiyo caanaha samayska inay ka korrimo yar yihiin kuwa naaska hooyada jaqa ama la siiso caanaha xoolaheenna oo tayo iyo caafimaadba fiican.

Brisamaadkii caanaha sameyska ah (milk bowder) ee dalka iman jiray ,waxay ahaayeen laba nooc oo kaliya- waa (Coast iyo Nido) halka maanta ay kor u dhaafeen 204 nooc oo caano ka kala yimaada aduunka meel walba. Caanahaas labada ah, waxay ka iman jireen dawlado aynu la laheen heshiisyo ganacsi oo la hubo tayada caanaha ay soo dirayaan, waxayna ahaayeen kuwa toos looga liso loda ay waddamadaasi dhaqdaan, halka caanaha aduunka inooga yimaada maanta lagu soo adkeeyo nooc ka mida jaandiga samayskooda caafimaad.

Waa in dawladda dalku si fiican ula socotaa caanaha, cuntada iyo daawooyinka dalka soo gala, si khatararaha caafimaadka looga yareeyo bulshada Somaaliyeed, oo dugsata mushkilado daba-dheeraaday oo is-biirsaday, caafimaad-darraduna ugu horreyso.

Caanaha sameyska ah ee dalka imaan jiray intaan leysku daadan, waxa ku iman jiray nidaam-sharci ganacsi laba dawladood, oo si saxa loola socdo tayadooda iyo maadooyinka



Eeg Bogga 32

Ka yimid Bogga 31

ay ka kooban yahiin oo saldhig u ahaa heerarar la aqoonsan yahay ee caalamku ku heshiiyo lana wada saxiixay.

Maxaa caanaha loogu soo qori waayey magaca ganacsiga shirkadda caanaha ee loogu soo qoraa magacyada haweenka Soomaalida. Jawaabtu waxay u egtahay kalsooni la'aan shirkadda caanaha soo saaray oo aan marin shuruucda caalamiya ee lagu ilaaliyo tayada cuntada isaga goosheysa dunida. Sidoo kale, waxay noqon kartaa suuq galin ganacsi oo laga raadinaayo qoysaska Somaaliyeed oo ka masuul ah daryeelka caruurta iyo qoyska, si iib fiican loogu helo caanahaas.

Caanaha hada dalka yimaada inta badan waxay ka yimaadan dalka imaaradka oo booyado aad u waawayn kaga soo qaada ama maraakiiba dalalka Niyuziland,







Holland iyado dib loogu cabbeeyo imaaradka, haddana ma laha la socod tixraac caafimaad. Kuwanooga yimaada laga Shiinaha ayaa aad khatar u ah, waayo la garan maayo, kumana cadda badeecadaha sharikaadka laga soo iibiyey, dalkeenuna male qalabkii lagula soconaayey tayada iyo noocyadooda badeecada kasoo degaya dekedaha dalka ama garoomada.

Waqtigii dawlad wanaagga, ganacsigu wuu xadidnaa, waxanuu ku dhisnaa heshiis ganacsi laba dawladood, welibana hey'adaha qaabilan ayaa la socon jiray oo baaritaan joogta ah ku heyn jiray si aan loogu soo qarin cunto, dawo ama caano waqtigoodii dhaaftay, hayeeshee, cid waliba waxa ay doonto ayey maanta la soo degtaa, cid maxaad siddaa tiraahdana male, si sahlanna ku gaara suuqyada dadku badecadaha ka iibsadaan.

**WQ: Dr Buux Ibraahin Aadan**

**Fayo-dhawre madax bannaan**

# Sida qoraagu u dhisi karo kalsoonidiisa



**1. Ku raaxeyso in aad tahay leyli!**

Marka uu qoraagu ku cusub yahay qallinleyda, waxa uu la kulmaa caqabbado.

Inta badan, waxa loo qariyaa ama aannu ka warhayn in uu qoraalku adag yahay! Sida oo kale, meesha ma soo dhigto, inta ammin ee uu qaadanayo.

Marka ay sidaa tahayna, marka uu qoraalka sidaa u bilaababa, faraha ayaa uu kaga gubtaa. Xaalkiisu waxa uu noqdaa: kurtin yahay ma waxaa aan ku mooday! Halkaasi ayay kalsooni la'aani kow ugu noqotaa!

Haddaba, waa in maanka aad ku heysaa in aad tahay qoraa curdin ah. Waa in aad soo dhaweysaa inaad wax kaa qaldami karaan ileen leyliguba biyaha waa uu daadiyaaye.

Marka aad xirfadaha kale baraneysid sida wadidda baabuurka, waa aad ku riyaaqdaa in aad tahay mid badhtanka kaga jira, waxbarasho cusub; qoraalkuna waa sidaas oo kale! Ku raaxayso in aad qoraa bilow ah tahay.

Wixii kaa kaa qaloocsama, qofkii kaaga aqoon badan ii toosi dheh, beddalkii aad ceeb u arki lahayd!Marka aad sidaa yeeshid, waxa aad noqon mid aad ugu faraxsan in uu yahay qoraa barbarrad ah.

Kalsoonida ayaa qanjaha ku tagi. Mar kasta wax baa kuusii kordhi. Keliya ku raaxeyso in aad tahay qoraa hadda ababbaaya (enjoy being beginner writer)

**WQ: Mohamed Heybe**

# Maxaa Ka dhaxeeya ogaalka badan iyo murugada !

In badan ayaan aamminsanaa in daalacashada ama akhrinta buugaagtu ay akhristaha u soo jiidayso oo uu ka helaayo farxad iyo raynrayn!

Waxa kale oo aan yaqiinsanaa in iibsashada akhristuhu iibasanaayo buugaagta ay u buuxinayso meelo ka madhnaa maankiisa oo ay waqaaciisa ka hallowsanaa u hagaajinayso !

Iskaba soo dhaaf waxaas oo idiloo, waxaan gadaal ka ogaaday in buugaagtiisa akhristaha ku keenni karto welwel iyo walaac badan, maxaa wacay, nimca walba nusqaanteeda ayay leedahay, kolkaa dhinac adiga oo Ka faa'idaysanaya, aad dhinaca kale kaa dheellido. Oo ruuxa akhristaha ahi ku cataabo Alla maxaa kugu watay akhrinta buuggaas ! Waayo waxa keliya ee aad kutubta ugu tegaysaa ee kaaga horreyaa waxa weeyaan Inaad ogaato runta aadka u qaadhaadh, ee aad waayo badan Ka wareegaa-laysanaysay, taas oo kugu keeni karta welwel, walaac iyo walbahaar tiro beel ah.

Kol kasta oo uu ogaalakagagu bato, oo aad waxa badan ogaato waa mar Kasta oo fikirkaagu xad dhaaf noqdo, fikirkaasina aad murugo badan Ka kasbato.

Sida uu ku yidhi qoraaga kitaabka, ninka lagu magaacabo(xaamid al-xamari),

" Waxa la arkaa in ay buugaagtu kugu ballaqaan alaabaabka dhibaatada"

Dabcan way kugu furayaan, sida uu maygaag Maxamuud maqaalkiisa, uu Ku Soo naqliyay, in inan ay saxaaiibo ku ahaayeen majaalka wax-akhriska aadna u dhoollacadayn badanaa una furfurnaa, ag wada akhriyeen dhiganaayaasha uu dhiteeyay qoraagii weynaa ee ( Fyodor Dostoyevsky), ee kala ah iyo buuga kale ee.



Kolkii ay labaada buug dhameeyeen waxa yarkii ay saaxibaada ahaayeen, ku habsaday is-beddel baaxad leh, kaas oo ku sababay in uu noqdo qof xidhxidhan, qaadana xanuunno nafsi ah noloshana Isha taban Ku eego, kana quusto xaayatada ka dib markii uu daalacday balanbalka iyo bayhoofka uu kaga warramayo qoraagaasi labadiisaa buug.

Kol kalena, markasta oo aad wax badan ogaato, waa markasta oo aad ogaato jaahilnimadaada iyo iimaha ay naftaadu leedahay.

Nin faylasoof ah ayaa laga hayay: "Mar kasta oo aaan wax badan ogaado, waa Kol Kasta oo aan agaado inaan waxba aqoon"

Halkaana waxa aynu ka subkan karnaa, in Marka ay jaahilnimadaadu kuu caddaato ay kugu sababto welwel iyo walaac fara badan.

Mar kale waa kii imaaamu shaafici lahaa"goorta aan koroshsado cilmi, waxa ii kordha inaan in badan ogaado jaahilnimadayda"

Dhinaca kale waxa kuu muuqanaya oo kuu bidhaamya waxa aan u muuqan ummadda aad la nooshahay, oo waxaad noqonaysaa indheergarad Ka ilhoreeya ummada uu la noolyahay, taasina ay Ku noqoto ayaan darro.



Waa kii lahaa Cismaan Askari (a.h.u.n)

Ninka ugu il dheerbaa

Dadka ugu ayaan daran

Waxaan lala arkaynbaa

Isaguun u muuqdee..

Jeer kale waa kii laha faylasoofkii giriiga ahaa ee lagu magaacabi jiray (Socrates)

"Hoog iyo halaag baa u sugnaaday ninka uu caqligiisu ka horreeyo samanka uu noolayahay"

Hawraar carbeedna waxay tidhaa"indha la'aanta waxa ka welwel iyo walaac badan, in aad adigu noqoto ka keliya ee wax arkaya"

Yacnii, haddii aad ummadda aad la nooshahay aanay u muuqan waxbana, adigu ha isku lurin waxaan lagula arkayn, oo kugu keli ah.

Ugu danbayn waxa aan ku Soo gebegabaynayaa, in qofku aannu wax badan baadhin, si aannu wax badan u ogaan, hal kaasna aanay murugo ugu haleelin.

Taladayda waxa weeyaan qof dhoohan Iska noqo, sida uu jubraan khaliil ku yidhi buuggiisa, " Dhoohanaantu waxay saldhig u tahay baraad li'ida, baraad li'iduna waa hoyga raaxada"

**WQ: Maxamed J. Cigaal**

# Garashooy kuma waayo.

***Sababaha keena aad ayay u farabadan yihiin waxaana ka mida...***

Garwaaqsiga naftadu waa mashruucyada ugu waaweyn ee qofka aadahana ah lamahuraan u ah jiritaankiisa qofeed. Waa barbilawga waxqabkiisa shakhsiyeed iyo bulsheed ba. La'aantiisna qofku uuna garan karin hawsha uu waqtiga, nafta iyo maalka u hurayo dheefta ku jirta. Waa marxaladda haddii uu aadanaha waayo dareemo ama ku suntanaado sawracseeg (Identity crisis).

Sido kale, qofka waxa uu noqdaa mid aan garanayn oo aan dhuganayn noloshu meesha ay u socoto, waajibaadka iyo xuquuqda naftiisa, xidhiidhka isaga iyo adduunka ka dhaxeeya. Dhibaatooyinka adduunka ka dhacaya tafsiir u waaya.

Sababaha keena aad ayay u farabadan yihiin waxaana ka mida: Cadaadis dhanka bulshada ka yimaadda (Social pressure) sida cunsuriyayn iyo habdhaqan xun oo uu bulshada kala kulmo. Waxa kale oo uu ka iman karaa tijaabooyinka shakhsigu sameeyo (Personal experience). Tusaale ahaan: Mar walba oo uu hawl bilaabo wuu ku fashilmaa. Waxa kale oo uu ka iman karaa dhibaatooyinka adduunka ka dhacaya oo uu fahmiwaayo sababaha ay ugu dhacayaan iyo sababo kale oo dad—samee ah oo farabadan sida: Culture influence, development stage, family expectation iyo kuwo kale oo badan. Sidaas darteed sidee buu qofku u garan karaa shakhsiyadiisa iyo jiritaankiisa nafeed.

Dr Mustafa maxmuud AUN oo si qurux badan ugu lafaguray mawduucan cutub kamida kitaabkiisa baan jeclaystay inaan idinla wadaago miidda uu inagu sooray buunigaasi. Bilawga hore waxa uu wax iska waydiinayaa waa maxay aadanuhu? Aadanuhu ma noole khayrside

> **“Adduunka muddo gaaban oo waqti xaddidan leh baan joognay ee sidee ku dhici kartaa ciqaab aan dhammaad lahayn”**

ah baa mise waa sharbadane? Mise wuu u dhaxeeyaa? Waxa uu tilmaamayaa waqtiga ay soo muuqato xaqiiqada nafta aadanuhu oo ah ilbiriqsiga doorashada uu helo, waana waqtiga qaangaadhku u bilawdo oo uu caqlina Eebe ugu deeqo. Bardhammaadka doorashaduna waa dhimashada iyo ka guuridda adduunka.

Qofkana waxa lagu soo saarayaa waxqabadkii ugu danbeeyay. Sidaa darteed bay xeerdheerayaasha Alle–yaqaanku dhahaan “qofku waa waxa uu ku dhinto”. qofkana looma ciqaabo falkii uu ka tawbad keenay.

Aadanaha Eebe waxa uu siiyay garoon nololeed oo balaadhan, garoonkaasi waxa uu leeyahay laba sallaan oo midna kor u baxa midna hoos u dhaadhaca. qofku marka uu soo galo isaga ayaa dooranaya inuu naftiisa iyo ruuxdiisa kor u qaado iyo inuu hoos u dhaco. Shakhsiga ruuxdiisa kor u qaada wuu soconayaa ilaa uu gaadhayo darajada ugu sarraysa ee raaxada iyo nuurka nafta. Balse kii hoos u dhiga waxa uu marayaa saddex marxaladood heer uu gaadho meesha ugu danbaysa ee mugdiga.

Maraxaladda kowaad waxa uu la mid noqonayaa xayawaanka dhinaca raacitaanka rabitaanka shahwadeed. Waxa hogaaminaysa shahwadiisa adduun oo kaliya. Marxaladda labaad waxa uu la mid noqonayaa manoolaha dhinaca qallaylka iyo qallafsanaanta qalbigiisa ku abuurmaya. Marxaladda saddexaad waxa uu la mid noqonayaa shaydaanka, dhinaca mugdiga iyo garqaadasho la'aanta.

Eebe weyne waxa uu ogaal dhammaystiran u leeyahay mustaqbalka qof walba. Balse ogaalkiisu ma aha ogaal addoonka doorasho la'aan ka dhigaya oo khasbaya ee waa ogaal koobis iyo ka warhayn wax walba oo dhacaya, dhici doona ama dhacay. Alle qof hanuun doonay uma diidin, qofna xumaan kuma khasbin.

Maalinka aakhiro marka la gaadhana shakhsi walba kitaabkiisii baa loo dhiibayaa. Inta adduunka la joogay qof walba digniin dhammaystiran baa la siiyay oo fariinwadayaal, caqli iyo dareemayaal muuqda iyo kuwa qarsoonba waa loogu deeqay.

Si uu u garto xaqa iyo baadilka, una kala saaro wanaagga iyo xumaanta.

Aadanuhu laba qeybood buu u qaybsami maalinkaas. Koox guulaysatay iyo kuwo guuldaraystay. Kuwa guulaystay waxa u bilaabmaya nolol kale oo qurxoon. Kuwa kale waxa ay u qaybsamayaan koox ku baroorata Eebow dib noo celi si aynu camal wanaagsan u soo samayno, iyo kuwo kale oo dood iyo muran la soo istaagi doona.

Waxayna ku andacoonayaan inay xadgudub iyo dulmi tahay ciqaabta la ciqaabayo, sababto ah waxa ay dhahayaan “Adduunka muddo gaaban oo waqti xaddidan leh baan joognay ee sidee ku dhici kartaa ciqaab aan dhammaad lahayn” Yacnii nuxurka dooddoodu waa iskuma dhigmaan xumaantii waqtiga kooban aan soo samaynay iyo ciqaabtan aan dhammaadka lahayn ee abadiga ah.

Alle—sarreeye labadaas kooxood ba hal aayad buu ugu warceliyaya Danbiga loo ciqaabayo ma aha mid ku xidhan waqti iyo meel balse haddii xattaa dib loo celiyo halkii ay ugu joogtay uun bay ka sii wadi lahaayeen geedigoodii madaxadaygga iyo inkiridda xaqqa. Sidaa awgeed diidada aan xadka ahayn waxa abaalmarin looga dhigay ciqaaab aan xad lahayn.

Waxa kale oo jirta dood kale oo uu danbiiluhu marmarsiiyo iyo qiil ka raadin karo. Waxa uu ku doodi karaa bulshada, waqtiga casriga iyo duruufta waayaha ayaa danbiile iga dhigtay. Balse taasi waa dood jaban, sababto ah bulshada iyo waayuhu waxa ay abuuraan wax walba oo fudaydinaya dhicitaanka iyo jiritaanka danbiga xataa qaabka danbiga bulshada ayaa samaysa, balse ma abuurto danbiile oo qofku isaga ayaa xakamayn kara naftiisa.

Waqtigii Nebi Aadan CS qofku haddii uu damco inuu sameeyo fal—danbiyeed dil ah tusaale; Waxa uu awoodi karayay dhagax iwm, waqtigii ka danbeeyay geed, ka dib isbadalkii nolosha waxa uu awooday seef, heer isbadalku gaadhay meesha ay maanta technologiyaddu marayso. Markaa bulshada iyo waayuhu waa fududeeye ee abuure ma aha.

Sido kale bulshadu ma baddali karto xaqiiqada nafta ku dahsoon. Tusaale ahaan qur'aanka Eebe waxa uu ku sheegay laba waalid oo wanaagsanaa balse wiilkoodu uu xumaan—fale ahaa. Sido kale ambiyada qaar caruurtooda iyo xasaskoodu ay lunsanaayeen. Xaqiiqada nafta waxa badali kara Eebe oo kaliya balse waa marka dalabka iyo rabitaanku dhinaca shakhsiga ka yimaaddo oo uu isbadal—raadis noqdo. Raadintu waa waddada nadiifinta iyo daahirinta ruuxda. Naftuna daahir ma noqoto ilaa sugnaansho cibaado laga helo maahine. Qofka marka uu anshaxa liita ka nadiifiyo naftiisa kuna qurxiyo anshaxa suuban ayuu haleelayaa sugnaanshaha cibaadada.

Intaas ka dib waxa laga rabaa qofka xaqiiqada raadinaya inuu naftiisa si joogto ah ugu xidho Eebe oo kaliya wixii ka soo hadhayna qalbigiisa ka saaro. Tilmaamaha wanaagsan ee magacyada Ilaahayna naftiisa ku qurxiyo sida: Naxariista, dhibrinta, dulqaadka, mahadnaqa Iqk. Ka dibna ku dadaalo gaadhitaanka darajada ugu sarraysa ee daahirinta nafta. Sidaas buu ku garwaaqsan karaa naftiisa

**WQ: Cabdi N. Faarax**

# Loolanka raga iyo Dumarka

Loolanka ama tartanka ragga iyo dumarka wuxuu dunida ka bilowday gaar ahaan dawladaha reer galbeedka waqti hore,  madaama oo aysan ahayn dad muslim ah, waxay isla meel dhigeen wax ay ugu yeeren xoriyada dumarka , ma aqaan waxa ay ku maamiyene.

xaqiiqatan haweenku mustawe iyo kaalin aad u wayn ayay bulshooyinka iyo guud ahaan dunida ku leeyihiin mana ahan wax la qarin karo lana dafiri karo.

Alle (sw)isaga ayaa aadamaha abuuray una qaybiyay labo jinsi oo ah rag iyo dumara, mid walbana karaameeyay kaalin iyo martabo muhiim ahna u dhiibay xadna dhex dhigay, kii ka talaaba ee xaga kale u talaabana uu nolosha ka dhacahaayo.




Dadyawga dunida qaar haweenka hoos ayay u dhigeen oo khalad wayn ayay taas ku galeen, halka qaarna ay buun buuniyeen booskoodi iyo maqaamkoodi wax aan ahayn ay la dooneen markas ayay ku dhacday "sagaaro tilaabadeedi ka tagtay tii nabigana gaari wayday"

Dunida reer galbeedku, mudo ayay raga iyo dumarka is dhinac erinayeen wax fa'iido ah khasaare iyo shalayto maahe kuma hayaan.

waxyaabaha ay ka dhaxleen ee dhibaatoyinka ah ee an layska indho tiri karin dunida qaarna ayba ku faafiyeen waxa ka mida:

- Taranka: Alle sw ayaa bani'aadamka u abuuray inay sidan u tarman, balse markii ay qaabkii dabiiciga ahaa ee nolosho u sacotay isku dayeen inay leexiyan ayaa waxa meesha ka baxay habkii taranka ee habonaa, waxana bilowday in qoyska ugu badan ay dhalan hal ama labo cunug, qaarkoodna ayba diidaan inay wax dhalaan.

- 50%: waxa dhacday in labada lamaane ee is qaba ay wax walba u qaybsadan si isla,eg taas oo meesha ka saartay masuuliyadii iyo maamulkii qoyska ileen labadii qof waa labo qof oo is garab socdee hawl kasta oo timaadana usiman, hadii uu ninku shaqeeyo 24 saac waxay doonaysa inay iyaduna 24 saac shaqayso, hadii uu xaas labaad guursado waxay doonaysa inay sidoo kale samayso.

- isku dhexdaadashada raga iyo dumarka: markii haweenkii xadkoodii laga talowshay oo quluwi lagu la kacay, waxa abuurmay wax dunidii nuurkii ka qaaday oo ay ugu yeereen LGPT????

_Lesbian: is guursiga dumarka

_Gay: is guursiga ragga

_Bisexual: rag iyo dumarba mid guursan kara.

_Transgender: in haweenayda nin loo badalo, ninkana naag loo badalo .

- kufsiga oo batay: meelaha qaar waxay gaartay in haweenaydu ay xitaa dacwoon kari waydo, markii la kufsado iyado ka baqaysa midka ay u dacwoonayso laftiisu inuu qashqashaado.

xog ururin laga sameeyay America 75% dhalinyaradu waxay soo dhaweyeen in la kufsado haweenka, sababta markii la waydiiyayna waxay ku warceliyeen sababto ah way qaawan yihiin.

iyo boqolaal kale oo anan qormadan yar ku soo koobi karin.

Intaa hadii aan uga gudubno doqonnimooyinkii ay ku kaceen caqabadihii ay kala kulmeen, muddooyinkan dambe, waxa ku soo badanayay bulshadeena gaar ahaan dhallinyarada loolan u dhaxeeya wiilasha iyo gabdhaha, waa wax aan la dhaadayn/loo fiirsanayn/la dareemayn, balse samayntisa leh oo sii kordhaya.

Innagu dad muslimiin ah ayaa nahay, wax walbana loo kala cadeeyay, balse arinkan waxa kenaya ayaan oran kara:

Dhalinyarada oo aan diinta aqoon badan u lahayn.

_Dawlad la'aanta iyo burburka dalka iyo dadka ku dhacay

_Dhaqamo shisheeye oo si wayn inoo dhexgalay mudoyinkii adambe

_Internet-ka oo an wax maamula lahayn, sidii la rabana loo isticmaalo, qofkii doonana isticmaali karo.

**WQ: Cabdullahi Saciid Saaad (Caalamiin)**



# Duqa Mooge: Halyey Soo Baxay Xilligii Loo Baahnaa



**Maayarka Hargeysa (3aad, midigta)**

Wadooyinka magaaladu waxay ahaayeen kuwo burbursan. Caasimadu waa muraayadda dal kasta laga daawado, horumarkeedu iyo bilicadeeduna waxay sawir ka bixisaa dalka oo dhan iyo waxqabadaka iyo kartida cidda hogaanaka u haysa dalkaasi.

Doorashadii duqa Mooge ka hor, caasimadu waxay ku sugnayd runtii xaalad aan la eegan karin dhinac kasta oo laga eego. Nadaafadda waxay maraysay heer laga dayriyo bedqabka iyo caafimdaadka dadka. Dooxa dheer ee dhexmara magaalada oo ah meesha ugu horreysa ee ishu qabato, wuxuu isu bedelay god xashiishka lagu daadiyo iyadoo dadku marka ay dul maryaan kaabadaha ku yaal dooxu ay sanka ka qabsadaan indhahana kala boodaan.



**Mid ka mida waddooyinka sameysmay intii mooge joogay**

Sidoo kale waxay ahaayeen kuwo dayac xad dhaaf ahi ka muuqdo oo gaadhiga muddo gaaban ku socdaa uu burburayao. In kastoo duqii hore uu mudnaanata kowaad ka dhigtay wax ka qabashada waddooyinka, isla markaana uu dadaal badan muujiyey, haddana wixiisii waxay ku dambeeyeen biyo col dhaanshay.

Marka lagu daro dooxa, magaaladu waxay leedahay meelo bannaan oo dan guud ah oo haddii la daryeelo bilicda magalaada iyo caafimaadka dadka wax weyn ku soo kordhin lahaa. Nasiib darro dhamaantood waxay ku sugnaayeen xaaalad la mid ah ama kasii liidata ta dooxu ku sugnaa.



**Xarunta d/hoose ee Hargeysa**

Duqa Mooge mudadii yarayd ee uu xilka hayay, waxa magaalada ka muuqda horumar dhinaca kasta leh oo dadka horumarka Somaliland jecel yididiilo wanaagsan ku abuuraya. Nadaafadda magaalada oo dhan ayaa kor u kacaday, iyada meelaha qaarkood aad dareemayso inaad joogto waddan horumarsan. Dooxii mar indhaha iyo sanka laga qabsan jiray iyo goobihii kale ee xashiishku buuxiyey sida dhaamamkii ayaa isu bedelay goobo loo dalxiis iyo temeshle tago.

Waddooyinka magaalada ayaa iyana isbedel weyni ku yimi. Waddooyin cusub oo hab casri ah loo dhisay loona calaamdeeyey iyo dayactir baahsan oo lagu sameeyey kuwii burbursanaa ayaa yareeyey sixmaddii isla markaana dalka iyo dadka baaburta wata u savegreeyey kumaankun dollar oo awel baaburta lagu dayac tiri jiray.

Inkastoo dadkii tirada badnaa ee duqa Mooge codkooda siiyey ay ku faraxsan yihiin waxqabadkiisa iyo dadaalkiisa, haddana waxa jira dad xaasidnimo iyo hinaase madax maray oo ooisku dayaya inay ceebeeyaan maayorka, wax qabadkiisa aan cadceedu qarin karinna qunjarafeynaya. Ilaahay isaga ayaa dadkiisa qaarna ku abuuray karti ay wax ku qabtaan qaarna ka dhigay wax ma tarayaal hadal aan macno lahayn shubaya qofkii wax qabtana xanuun ka qaadaya.

"Goonbaartu waxay caasidaa midaanay gaadheyne,

ma gudboona gaarida sare iyo gidirta naaxdaaye. ..

Gobonnimo dhamaanteed haddi la isu wada geeyo

ma gudboona geesiga hanta iyo gocorka caayaaye"- Salaan Carrabay

Waa in duqa lagu garab galaa dadaalka uu wado looguna duceeyaa. Horumarku dadka oo dhan ayuu faa'iido u yahay, dalkana sumcad wanaagsan ayuu u soo jiidayaa halaga daayo xasadka iyo hinaasaha aan wax laga faa'idaa jirin.

**WQ: Fahmy Abdillahi**

# WAA KHATARE YEYNAAN KU DEGDEGIN




Is fahamka dhowaan dhexmaray Somaliland iyo Itoobiya waa doonista dhabta ah ee Itoobiya waa marin badeed ay iyadu yeelato. Deekado badan ayaa jira oo gobolka ku yaal oo Itoobiya wax kala soo degto kalana soo degi karto mustaqbalka, sida Jabuuti, Berbera, Mombasa iyo Lamu oo ay leedahay saami aad u buuran.

Samaysashada ciidan badeed, iyada oon bad lahayn, waxay ka turjumaysaa siday uga go'an tahay inay hesho bad ay iyadu leedahay taasoo ay marar bandanna sheegeen siyaasiinta sare ee Itoobiya, weliba si gaara badda Cas.

Inkastoo juqraafi ahaan badda Casi ay tahay 2,250 km ee u dhexeeya gacanka Caqaba iyo Bababl Mandab, haddan marka laga hadalayo badda Cas, waa la isla garanayaa in gacanka Cadmeedna ku jiro. Saldhig militari oo Itoobiya ku yeelato badda Cas, waa bilowga helitaanka bad ay yeelato.

Is-fahamka dhowaan Somaliland saxiixday, waxa ka soo dhex bixi doona heshiisyo kala duwan oo labada dhinac dhexmara. Waxa hubaala in Itoobiya mudnaanteeda kowaad tahay helitaanka bad ay yeelato oo saldhig iyo dekedaba ka dhisato. Somaliland Iyana, waxa laga rabaa inay miiska soo dhigto wax kasta oo ay ku bedelanayso marin badeed ay Itoobiya siiso , hadduuba meel maraayo, shaki bandanna ku gadaaman yahay.

Marka xaalku sidaa u cada yahay , waxa looga baahan yahay xukuumada talada haysaa inay abuurto koox khubaro ah oo isku dubarida waxa Somaliland golaha la imanayso. Xubnaha kooxdaasi waa inay ahaadaan niman strategists ah oo meel fog wax ka eegaya caadfidna nooc kastoy tahay ka xor ah.Hadalada suuqa ku jira ee dadka qaar xisaabinayaan shilimada kasoo geli kara saldhiga waa in dadka sidaa dhow u fekeraya aan lagu darin kooxdaasi.

Waxaanad hurayn hora loo yeelaa, Somaliland waxa la gudboon inay arrinta ka badheedho oo ta Ethiopia doonayso ee marin baddeedka ah gorgortanka kaga bilowdaa. Aqoonsiga ka dib, waa in dhul -dhul lagu bedeshaa oo khariidada labada dalba wax lag bedelaa. Labaatan kilo mitir oo Seylac corridor ah waa ku bedelan karnaa 119,000sq km oo Hawd and Reserve Area ah. Arrintaasi waa arrin taariikhi ah oon dhiba badan yeelanayn.

Maadaama inta heshiiska DP World jiro aan deked kale dalka laga dhisi karin, waxa dhici karta in Ethiopia soo jeediso in marka hore saldhigga milateri laga kireeyo. Wax kasta oo dhaca goobta saldhigu waa inaanay noqon meel dalka dhexdiisa ku began sida Lughaya, Bulaxaar ama Berbera maadaama saldhigga iyo halka ku began xadku isku xidhmayaan, marinkaasina uu noqon doono meesha ay Itoobiya ku gorgortami doonto mudada kiradu markuu dhamaado.

Waraysigii madaxweyne Bixi ee todobaakan waxa ka soo baxay in madaxweynuhu u arkayo saladhig Itoobiya laga kireeyaa inuu la mid yahay saldhigyada dalalka kale laga kireeyo.Waa inaan ogaanaa in aanu saldhig waddan aan jiraan nahay aanu sina ula mid ahayn saldhig Maraykan amd Ruush ama Emaarati oo ah waddamo qaarado kale deggen oo saldhigyadooda kasoo gelidhinaca badda iyo cirka halka saldhigga Itoobiya meesha ugu weyn ee laga soo gelayaa ay tahay dhinaca dhulka.

Haddiba ay kiro noqoto, iyana saamiga (Ethiopian Airlines), oon meelo badan ku arkay, waa inaan lagu dagmin. (Ethiopian Airlines) waa (public enterprise) saacad kasta la qarameyn karo ama sida shirkadaha diyaaradaha lagu yaqaan si fudud khasaare u geli karta ama u musallifi karta.

**WQ: Fahmy Abdillahi**

**abdillahifahmy@gmail.com**



# Tayo Darrada Dawooyinka Dalka Dibada Uga Yimaada



Bulshada aadka ugu il daran xanuunada ilaahay u keenay oo aad

Dawo haday bukooto maxaa lagu dabiiba, dabku haduu dhaxmoodo maxaa lagu diiriyaa. Dawooyinku markay tayadoodu liidato waxay samayn caafimaad soo gaadhsiyaan bukaha dawo qaataha ah ma jiro qalab iyo sharci lagula socon kara daawooyinka dalka iyo goobaha ganacsi ee dawooyinka dalka dibada uga yimaada

Isticmaalka daawooyinka aan dr kuu qorin waxaad kala kulmaysaa halis caafimaad daro oo soo wajahda bukaha waa in daawooyinka soo dajintooda ganacsigooda lagu maamula siyaasad cad oo dawliya si loola socdo khatarta ka iman karta daawooyinka iyo goobaha farmasiyada iyo daawo soo dejiyaasha dalka lagula socdo ka ganacsiga daawooyinka ay ka iibinayaan bulshada aadka u taagdaran ee u cadiban xanuunada ay u raadinayaan in ay u helaan daawooyin si wanaagsan wax uga tara bukaankooda

Farmasiyada iyo shirkadaha dawooyinka ka ganacsada waa in lagu soo kooba shirkado oo ku midoobaan ganacsiga daawooyinka

Waxyeelada daawooyinka dalka yimaada ayaa ka badan faaidada looga baahan yahay in aynu ka helo daawooyinka

Dawooinka marka la soo saarayo tayada leh, waxa lagu tijaabiyaa nooc ka mida jiirarka, waa daawooyinka ay tayadoodu aad u fiican tahay ee kasoo baxaya shirkado ama dawlado ka haysta ama ka diwaan gashan hey'adda caafimaadka ee aduunka.

Inta badan dalkeena aad bay ugu yar yahiin in la helo daawooyin tayadooda caafimaad aad u sarayso, waayo qiimaha daawooyinkaas oo aad u qaaliya iyo iyagoo ku yimaadan dalka sharci heshiis laba dawladood oo caalamiya waa marka la raacaayo qawaaninta sharci ee lagu maamulo siyaasada ilaalinta tayada daawooyinka.


Ta kale, dalku male sharci-caafimaad oo xakamaya ganacsiga daawooyinka dalka dibada uga yimaada dalka, waayo wasaaradda u xilsaaran ayaaba ah mid gacan-saar malaha la le kuwa awada dhcday dadka ka iibiya . Daawooyinka ka yimaada dalka India iyo chine oo tayadooda aad u hoosayso marka la dhinac dhigo shirkadaha iyo warshadaha kale ee soo saara daawooyinka aduunka laga isticmaalo

Hadaba, labadan dal oo uga faa'idaysta korodhka tirada dadkooda iyo noolosha adag ee ka jira, ayaa waxay suurto si tuuga ah ugu tijaabiyaan dadkooda markay hubinayaan tayada dawada ay soo saaraan, taasoo dawada ka dhigta mid si sax loo ogeyn tayannimadeeda ama waxtarkeeda. Walaaca kordhaaya eel aga dawooyinka nooga yimaada dalakaas ayaa ah mid aad u xoogeysanaya, haseyeeshe, waxad moodda in madaxdeenno aayan danba ka laheyn dadkooda suntan la quudinayo oo maalinba tiro badani dawo taya xun u dhintaan.

Howl aad u adag ayaa u taal howlwadeennada dalka u qaabilsan dawada iyo cunnada, waa wasaaradaha caafimaaadka iyo beerahee iyo hey'adda taya-dhoorka'e, haddii la doonaya in la badbaadiyo kumanyaalka u dhinta cunt aiyo dawo dhacay. Shacabku xaqbey dowladdooda ugu leeyihiin inay su'aal ka weydiiyaan sababta aayan hey'adahani saani ugu shaqeyneyn, la xisaabtanna aan loo marineyn. Maaha dowladdu daawato mushilkadan dad abuurka ah ee shacabka naftooda iyo maalkooda lagu baneysanaayo. Somaaliya kuma sii socon kadho in dad yari ay sidii ay rabaan ka yeelaan nolosha iyo hantida shacabka Somaaliyeed. Waa fariin shacabku diraayo maqaalkani.

**WQ: Dr Buux Ibraahin Aadan**

buux02010@gmail.com



# Danjire Iyo Shaqada Uu Qabto



Wakiil ama Ambassador waa Sarkaalka ugu sareeya xagga darajada diplomasiyadda waxa uu waddan si sharci ah ugu diri karaa

inuu wakiil uga noqdo waddan kale oo madax bannaan,ama hayad caalami ah,weedhan waxa kale oo loo adeegsan karaa shakhsi isagu isu xil saaray inuu howlo gaar ah bulsho meel uga fuliyo.

Waddanka loo diray waa inuu aqbalaa marka uu shakhsigan darso aqoonstiisa iyo taariikhdiisa waxanu ku aqbali karaa "Persona Gratta" haddii wadankaasi aqbali waayo wuxuu odhanayaa "Persona non gratta"shakhsigan waddankayaga lagama ogola isla markaa waa in dowladda Soo Diratay keentaa shakhsi kale sida uu qeexayo "axdiga Vienna ee Diplomatic relation 1961"waxa lagu ansixiyay heshiiskaas in dhowridda diplomasigu tahay qodob ka mid ah Shuruucda Caalamiga ah (International law).

Maadaama ay sidaas tahay oo la siiyay diplomasiga dhowrsanaan aad u sarraysa, dabcan,Isagana waa inuu ahaadaa qof dhowrsoon oo ilaaliya waddanka soo dirtay Sumcaddiisa haddii taas la waayo wuxuu dhaawaci karaa xidhiidhka labada waddan.

## SHARAFTA IYO DHOWRSANAANTA DIPLOMASIGA

Diplomacigu wuxuu leeyahay dhowrsanan iyo inuu si nabad ah ugu gudbi karo meel kasta oo uu marayo waxa ka mamnuuc ah in waxyeello loo gaysto,laguma xukumi karo sharciga wadankaas uu joogaa uu leeyahay, laguman soo eedayn karo sidoo kale lama baadho shandadihiisa iyo wixii alaab ah ee u socotta safaaradda ee uu ku qoranyahay magaca safaaraddu.

Waxa suurto gal ah haddii diplomasigu galo fal danbiyeed aad u wayn in wadankii uu ka yimid ka gudo danbigaa uu galay shaqadiina ku waayo,Waxa xusid mudan safaaradda uu waddan leeyahay ciidanka ama police ma geli karo,sababtu waxay tahay safaaraddu waxay ka mid tahay dhulka wadankaas safaaradda leh albaabka keliya ee loo mari karaa waa in lala hadlo dalkii safaaradda lahaa.

## SHAQADA DIPLOMASIGA AMA AMBASSADORKA

1- Marka ugu horraysa waxa uu yahay calaamad u taagan waddankaas uu ka yimid,waxa kaloo uu wakiil ka yahay Madaxweynaha wadankaas soo dirsaday dabcan waa muraayadda laga daawan karo waddankaas soo dirtay nooca uu yahay,hadii uu wanaagsanyahay waddanka uu ka yimid wuu wanaagsanyahay hadduu xunyahay waa taas cakiskeeda.

2- Waxa uu xidhiidhka u hayaa oo uu wanaajiyaa labada waddan ee uu u dhexeeyo wadankiisii uu ka yimid iyo wadankan uu martida u yahay wax kasta oo dano ah oo ka dhexeeya waa inuu qaybta ugu badan ka qaattaa.

3- Waxa uu magan geliyaa xaqoodana ilaaliyaa Muwaadiniinta wadankiisa ah ku nool waddankaas uu joogo,waxa kaloo uu xidhidhiyaa Jaaliyadda halkas ku nool horumarkooda iyo la shaqayntooda.

4- Waxa uu xidhiidhiyaa sidii ay u qaybsan lahaayeen labadan waddan wixii horumar dhaqaale iyo xaddaarad bal eh.waxa bixiyaa taloyinka Siyaasadda.

5- Waxa uu ka qayb qaattaa sidii ay nabad gelyo iyo is faham ugu wada noolaan lahaayeen labada waddan xidhiidhkooduna u fiicnaan lahaa,isla markaana wuxu ka hortagaa wixii is maandhaaf keeni kara.

6- Waxa uu ka sheqeeyaa Danaha iyo xidhiidhka labada waddan,waxa uuna kobciyaa heshiisyada iyo axdiyada ka dhexeeya labadan waddan,waxa uu soo gudbiyaa akhbaarta hadday tahay ganacsi,horumar iwm.

Intan oo keliya laguma koobi karo shaqada diplomasiga

Wa billahi towfiiq

**Rashiid Odowaa**

khadarsalaan@gmail.com

# Joojiya Ceebaha Ka Dhanka Ah Gabdhaha Soomaaliyeed.

"Kuwa ku sheegaya gabdhaha dhowrsoon dambi fool xun..

Dumarka uslimka ah oo sharaftooda meel looga dhaco oo gogol dhaaf iyo anshax xumo lagu sheego ama aflagaado kalaba loo gaysto Islaamku waxa uu ku daray dambiyada waaweyn ee khatarta ah ee lagu naar muto.

**Ilaahay waxa uu yiri:**

"Kuwa ku sheegaya gabdhaha dhowrsoon dambi fool xun oo aysan waxba ka ogayn,waxaa lagu nacaladay adduunka dushiisa aakhirana waxay leeyihiin cadaab weyn.

**Rasuulka scw wuxuu yiri :**

"Xadiis uu Abuu Hureyra Rasuulka scw ka wariyay ayaa ahaa in Rasuulka scw uu yiri ka dheeraada todobada dambi ee dadka halaagta,waxay yiraahdeen oo maxay yihiin Rasuulkii Allow,Rasuulka scw wuxuu yiri: Waa ilaahay oo loo shariik yeelo,sixirka,naf xaq daro lagu dilo,ribada oo la cuno,maalka agoonta oo la cuno,in iyadoo dagaal jihaad ah lagu jiro la cararo,iyo in sino iyo xumaan lagu sheego gabdhaha dhowrsoon ee muminiinta ah"

Diinta islaamka sideetan karbaash bay ku xukuntay qofka gogol dhaaf ku sheega gabar muslimad ah haddii uusan u keensan afar markhaati ah oo arkaysay markii ay falkaas ku kacaysay.

Waxaa waayahan aad u badanaya dadka meel oga dhacaya sharafta gabdhaha soomaaliyeed ee Muslimka ah kuwaas oo caadaystay inay baraha bulshada ku fadeexeeyaan ama wax aan u qalmin ku tilmaamaan qaar ka mid ah dumarka soomaaliyeed.

Marka wiilal Soomaaliyeed yiraahdaan maanta ma jirto gabadh Soomaaliyeed oo dhowrsoon oo ay wiilal kalana u jiibiyaan oo misana la waayo mid qura oo yiraahda joojiya,waa musiibo inteeda la eg.

"Markaad isla dhex mareyseen oo aad afkiina ka sheegayseen wax aydan cilmi u lahayn oo aad moodaysaan wax sahlan iyada oo ay -aflagaadadaasi Alle agtiisa ka tahay mid weyn".

Dhab ahaantii waa wax laga xumaado in qaar ka mid ah ragga Soomaaliyeed ay si xun u bah dilaan haweenka Soomaaliyeed ee dhalay ama la dhashay ama ay dhaleen amaba u dhaxa.

Waxyaabaha qaarkood waa ceeb in laga xishoodo mudan,waxanan warkayga ku soo koobayaa ragga soomaaliyeed ee ku howlan ceebaynta hablaha Soomaaliyeed ee muslimka ah ilaahay ha ka cabsadeen oo ha joojiyeen warxumo tashiilka iyo dhagxumada ka dhanka ah gabdhaha soomaaliyeed ee sharafta iyo cisiga mudan.

# MAXAA DAAWO U AH HILMAANKA?




Hilmaanka iyo fahmo xumidu waa xanuun beryahan dambe aad looga cabanaayo, taas oo aad arkayso qof dhalinyaro ah oo haddana markaad weydiiso kugu oranaaya waan iloobay ama ma xasuusto, markaan si-daa leeyahay ulama jeedo yaan waxba la ilaawin, waayo ilaahay ayaa bini'aadamka ku tilmaa-may ilowshiyo badane, balse waxaan ulajeedaa ilowshiyaha xanuunka ah ama xasuusta oo Qofka ku yaraata, sabab kastaa-ba ha keentee. Waxaan jeclahay inaan maanta halkan ku soo bandhigo Labo qiso iyo daawa-dooda sida ay suurada Quraan-ka ahi u daaweysay.

Ibnu Haashim RC, ayaa siiradi-isa ku werinaaya (masaajidkii Ibnu cabaas ayaa maalin wax-aa soo galay wiil dhalinyar ah, dharkiisuna ay wasakh leeyihiin, isla markaan isla hadlaaya oo xagga maskaxda ka jirran (waa-lan). Dadkii Masaajidka joogay ayaa arkay Wiilkan xanuunsan-aya ee masaajidka soo galay, ka dib dibada ayay u saareen. Ibnu Cabaas ayaa sheekadii maqlay oo dadkii ku yiri:- muxuu ahaa Wiilkani?, waxeyna ugu jawaa-ben:- waa wiil xanuunsan oo waalan.

Ibnu Cabaas RC, ayaa yiri iigu yeera wiilka, markii loo keenay ayuu gacmihiisa madaxii wiil-ka saaray wuxuuna ku akhriyay suuratu Yaasiin, markuu ku dhameeyay akhriskii ayuu ilaahay u soo celiyay caqligiisii, xanunkiina ka caafimaa-day? Dadkii ayaa weydii-yay wuxuu ku akhriyay ee ilaahay caqliga ugu soo celiyay wiilka?, Wuxuu-na ugu jawaabay waxaan ku akhriyay Suuradii Ra-suulku ku sheegay iney tahay wadnaha quraan-ka. (Suuratu Yasiin).

Sheekhul Islaam Ibnu Taymiyah ayaa yiri:- Haddii waxaan doonayo inaan xafido ay igu adkaato xifdintiisu ama markasta aan hilmaamo, far-aha ayaan ka qaadi jiray wax-aana soo qaadan jiray kitaabka Qur'aanka, waxaana akhrisan jiray Suuratu Yasiin, markan dhameeyo ayaan ku noqon ji-ray wixii igu adkaaday ama aan hilmaamay, markaan hal mar akhriyo ayaan xafidi jiray.

Inkastoo Qur'aanku dhamaan-tii hanuun iyo daawo u yahay dadka muslimka ah ayey had-ana suuratu Yaasiin tahay fura-ha maskaxda iyo daawada ilo-wshiyaha.



# Waxan ahaa gabadh yar oo 17 jir ah, markuu....

Waxay aaminsanayeen markay odaygan ii guuriyaan inay faqriga ka baxayaan, si ay uga baxaan faqriga , waxay aaminsanaay-een inay ka guurayaan halka ay deganaayeen, waxay aamin-sanaayeen in carruurtayada oo dhan magaalada la keeni doo-no. Waxay aaminsanayeen inay daaro dhaadheer gali doonaan se ma dhicin halkay deganaay-eenna kamay guurin noloshoo-diina ismay beddelin. Iska daa inay is beddeshee waxay dhax-leen abaaro badan inay iskaga danbeeyaan oo xooluhuna ka madhaan.



Waxan ahaa gabadh yar oo 17 jir ah, markuu aabbahay ii guuriyey oday 70 jir ah oo wad-kii dhale ah oo la yidhi, "Lacag buu leeyahay dibadahana wuu ka yimi." Aabbahay waxa uu ahaa tuuladan yar een deggen-nahay odayaashooda. Hadalki-isa hadal kale lagama daba keeni jirin aad baa loo ixtiraami jiray waxan ahaa guri danbays-tiisa.

> "Aniga ayaa ku siin doona shaqo gurigayga ayaad joogaysaa ee aynu heshiinee barri galinka hore ii kaalay.

Maan haysan hooyo iga celisa oo ii diidda guurkan la igu qasbayo ee ah sidii aan ahay neef xoolo ah oo lagu beddelanayo shillimaad koo-ban. Waxan ahaa rajo anigoo yar ayey hooyaday geeriyootay walaalahayga iga waaweynaa oo wiilal u badnaana aabba-hay ayey ku raaceen in odayga la i siiyo. Markasta hamigayga ugu weyni wuxuu ahaa, **"Goor-maad tegi magaalada la sheego ood wax ka baran?"** Hammigaan lahaa waxaa hu-maag madow ka dhigay guur qasab ah oonan raali ka ahayn haabkiisana haynin. Guur aanan helin gayaankay oon gar u la-haa in aan haddii aan cid nolol la wadaagayo aan guursado wiil gayaankayga ah oonu dhib iyo dheefba wadaagno.

Haddii la ii guuriyey odaygii, guur shuruud la'aana galbiskayaguna dhacay. Sad-dex toddobaad kadib wuxu ku noqday dalkuu ka yimi, maan aqoon meel uu ka yimi. "Dibadda uun buu ka yimi oo waa Xaaji." Ayaan maqlay. An-iga magaalada la sheego ayaa dibad ii ahayd, weligayna maan arag maqal mooyee. Waanu

Eeg Bogga 50

Ka yimid Bogga 49

kala nolol duwanayn odaygan awoowgay ka weyn. Waxan isku dayey in aan reerka ka baxsado se iimay suuroobin.

Saddexdaas toddobaad ee uu joogay waxay ii ahayd iyadoo naarta Jahanama aan ku dhex jiro, habeen kasta oohin ayey ii ahayd markasta waxan ku ooyi jiray **"Hadday hooyadaa nooshahay maanta sidan maad noqoteen, hadday hooyadaa nooshahay maanta dhibi kumay soo gaadheen se qaddarta eebbe ayaa kaa horraysiiyey godka lagu jannee garab wayn bay ii ahaan lahayd."**

Waxan Alle ka baryey in odaygan Malagu mowdku u soo degdego. Muu dhimane waakaas 3 toddobaad ka dib tegay. Wuxu maqnaa saddex sano. Saddexdaas sano xasuustayda wuxuu i soo xidhiidhiyey saddex jeer waxabay ka dhigan tahay sannadkii hal mar in uu i soo xidhiidhinayey.

Maan kala jeclayn xidhiidhintiisa iyo la hadalkiisa toona waaban ku faraxsanaa in uu iga maqnaado ama uu dhinto si aanu iigu soo noqon. Maan haysan alleenka gacantee aabbaa anigoo duleedka guriga ku eegaya adhi ii keenay jiray alleenka oo ila xidhiidhsiin jiray. Mooyi malaha wuxuu ku yidhi, **"Saqiirtii yarayd aan la hadlee iigu dhiib."** Waxan is idhi waxa la xasuusiyey in uu xaas ku sheeg kaga yimi dalkii da' uu igu xasuusto muu haysane, dhagtaa loogu sheegay baan is idhi! Imika waaba siddeetan 7 la'

Maalintii naskugu kaayo danbaysay xagga wada hadalkayagii, wuxu ii sheegay in aanu soo noqon karayn, waa qiyaastii markuu ogaaday in Malaku Mawdkii aan ku habaaray saddex sano ka hor u soo dhawyahay, ilayn **"Nin wayni wadkii waa yaqaanaaye." Wuxu igu yidhi warqaddaadii waan kuu soo dirayaa ee sidaas ula soco, intaas in ka badan waqti kaa lumin maayee."**

Marka horeba wuxu iga dhigay carmal xaas ah, **"Godka lagugu madoobee dhe markaad dhimato."** Waxan ahaa gabadh yar oo uu ku xukumay jeel 3 sano ah. Maalintuu se hadalkaasi ka soo baxay waxan noqday in aan ka soo baxay jeelkii 3da sano aan ku xidhnaa,waxan i soo gashay saxansaxo udgoon oo neecow qabow wadata.

Dad baabuu u yahay oday dhaqmeed xeerka guurka iyo noloshaba wax ka yaqaanna intii 2 cumaamadood iyo laba macawisood oo aan is idhi huudhaydhkaa looga soo saaray huudhaydhka looga soo saaray uu isku istaago ayey dad soo horjoogsadaa. Sarajooga ku dhac dhe. Wuxu iga galabsaday habaaro aanay ayeeyadaydii afraad ku habaar tami jirin. Wuxu i dhaxal siiyey in aan noqdo islaan qumayo ah oo habaar uun la soo taagan.

Saddexdaas sano ka dib waxan soo gaadhay magaalada si aan uga raadiyo nolol ka duwan tan miyiga. Waxan filayey in ay i soo dhawaynayso nolosha magaaladu, se may noqon, inan yar oon haysan cid ay la noolaato cid tirsanaysa oo ka danbaysana aanay jirin inkastoo reerkayaga oo buuxa aan ka imi haddana waxba kamay jixan jixayn in aan joogo iyo in aan maqnaado . Markaan magalada imi waxan ku soo hagaagay gabadh eddo ahaan iigu toosan, gurigeeda waxan joogay ilaa 2 sano soo dhawayn fiican kalamaan kulmin waxan ahaa adeegto keliya. dugsi la iguma darin haddiiba aan ka helay meel aan seexdo waxba igama maqna.

Nolosha waan arkay qadhaadh iyo macaan ka ay leedahay intaan noolaa mana rabo in aan ku sii lumiyo nolol dirqi ah oo la is qasbayo waayo waxay i dareensiisay gabadhaasi in aan gurigeeda sii joogin.

Dumar aanu jaar ahayn oo aanu isku baranay booshari jaarka ahaa ayaan waydiiyey in ay u baahanyihiin shaqo iyo inkale hooyo Cibaado oo ahayd hooyo aad u qiime badan oo maqlaysay markaan dumarka u sheegayey baahida shaqo guri aan u qabo oo miisanaysa baradho ayaa i tidhi, **"Aniga ayaa ku siin doona shaqo gurigayga ayaad joogaysaa ee aynu heshiinee barri galinka hore ii kaalay."** Farxad aan la qiyaasi karin baa i gashay oo aan u qaadan waayey. Degdeg baan ugu idhi **"Haye habo khayr Alle ha ku siiyo waad iga farxisee."**

Gabadhii eddada ii ahayd ayaan la wadaagay in aan ka tagayo oonan intaas in ka badan la joogayn. Si aan khilaaf iyo isjiidjiid ku jirin baan iridda albaabkeeda uga soo baxay.

Waxan u tegay Habo Cibaado. Shaqadii gurigaan u bilaabay waxay iila dhaqantay sidii aan ahay inanteeda waxay taqaanay xuquuqda dadka gaar ahaan waxad moodaysay in ay uga soo baxday Jaamacad xuquuqda carruurta.

Waxay ii noqotay hooyo iyo aabbo, way i korisay waanay i kaalin galisay. Waxan ku noolahay gurigeeda mudoo 5 sano ah. Mudadaas **"Hooyo"** Waxaan ahayn imay odhan. Dadku ma moodaan inaan u ahay inan adeegto oo caawisa se waxay moodaan inay hooyo dhab ah ii tahay dadka qaarna waxay moodaan in aanu nahay dad qaraabo ahaan aad iskugu dhow. Nolol, farxad iyo degenaansho badani ku jirto ayaan ku noolahay. Waxay igu dartay dugsiga loogu talo galay dadka waaweyn iyo madarasad quraan si aan wax uga barto


**W.Q: Faadumo Buuni**

libaaxo37@gmail.com

# HA LAGA TAGO SADBURSIGA!

Kitaabka (Caalamku muxuu ku khasaaray dib-u-dhicii muslimiinta) oo uu qoray Sheekha wayn ee Hindiga ah Alle ha u naxariiste eh (Abul Xasan Al nadawi) ayuu ku yidhi sidan soo socota:

**HA LAGA TAGO SADBURSIGA**




Waxa soo maray arlada carabta, xili taariikhda ka mid ah, oo noloshu ku wareegaysay QOF KALIYA, WAA QOFKA BOQORKA AH AMA KHALIIF KA AH, amaba tira yar oo rag ah, waa wasiirada iyo caruurta boqorada. dhulku waxa uu ahaa mid uu iska leeyahay QOFKAA

badhaadhay, umaduna dhammaan waa xayn la leeyahay ama adoomo ah, isagaa ku amar-kutaagleeya xoolahooda, hantidooda, nafahoooda, sharaftooda.

Umaddaa uu xukumayayna waxa ay ahayd hadhkiisii , ama noloshiisa wax kaabe u ah.

Noloshu waxa ay ku wareegaysay QOFKAA, taariikh, cilmi, suugaan, gabay, wax soo saar. Haddii qof yidhaa xiligaa ka sheekee, ama suugaantii xiligaa eeg, waxa wada haysta umadii (dhan kasta) qofkaa, waaba , sida geed wayn oo ,doogii hareerihiisa iyo geed-gaabkii ku dhawaa, hawada iyo cadceeda ka qariyay, sidaas ayay umaddii qofkaa uugu libidhay, oo noqotay mid caata ah oo aan shakhsiyad iyo rabitaan lahayn, oo xoriyad iyo karaamaba lahayn.

Eeg Bogga 52

Ka yimid Bogga 51

QOFKAASI waa ka noloshu u shidantahay, isaga ayaa beer waluhu u daalaa, ganacsaduhu u shaqeeyaa, farsamayqaanku u dadaalaa, qoraaga iyo gabayaagu wax u curiyaan, isagaa hooyooyinku ubadka ay dhalayaan loo hibeeyaa, ragu dagaalka u dhintaan awgii, ciidamadu u dagaalamaan, isaga ayay arladu macdanteeda u soo tuftaa, baddu khayraadkeeda siisaa, khayraadka iyo kaydka arlada isagaa loo soo saaraa.

Umadiina iyada oo wax soo saarka iska leh, waxaas oo badhaadha ahna gacanteeda ku keentay, nolol saboola ama adoon la leeyahay ah , ayay ku nooshahay, waxa raali galiya waxoogaa miiska boqorka ka soo duulduula, ama inta isaga ku xeeran hadhaagooda, markaas ayay mahad naqdaa. Intaa yar ayay xataa marar waydaa, markaas ayay iska dulqaadataa, aadaminimadeeda ayaa laga yaabaa inay dhimato, oo aanay wax dareena muujin, iska dhaaf taa oo waaba ay isku dha-dhajisaa, oo is tidhaa bal in aad fursad yar uun ka hesho.

Arin kaasi aan sheegay waa waayo in badan ka hana qaaday dalalkeenan bariga, oo nolosha in badan raad kaga tagay, nafteeda, suugaanteeda, gabayadeeda dhaqankeeda, bulshadeeda, oo laga heli karo wali magtabadaha carabta, waxa si fiican u soo bandhigay kitaabka ALF-LAYLA-WALAYLA (kun habeen iyo habeen). Kaas oo si xirfadaysan uga waramaya noloshii xilagaa. Xiligii boqorka fadhiya Baqdaad ama Dimashq ama Qahira, uu ahaa wax kasta isagu, iyo jilaaga nolosha ee ay wax walba ku soo ururayaan.

Xiliyadaa uu ka sheekeeyay kitaabka ALF-LAYLA-WA-LAYLA, ee sheekooyinka iyo khayaaliga lahayd, ama uu ka sheekeeyay kitaabka ALAQAANI, taariikh iyo suugaanba, , muu ahayn Xili islaam lagu sheego, mana uu ahayn xilli arimuhu caadi ahaayen oo caqligal ah, islaamku waxaa raali kama aha, caqliguna ma ogola, is ka dhaaf in uu ogolaada oo, islaamkuba waxa uu u yimid in uu waxaa dabar gooyo, waana uu ka dayriyay , boqorada caynkaasana si cad ayuu u reebay fool xumadaa ay wadaan, sida boqoradii Faaris iyo Rome, waxa uu aad u diiday islamku habkoodii sadbursiga iyo noloshii bakhaanbakha boqorada.

Nolosha caynkaas ihi ma aha mid jiraysa oo soconaysa, caalamka meelna iyo xilina ka soconmayso. Mana jiray-so, haddii aan bulshada laga xoog roonaan, ama aanay maskax daro umada ku iman, ama aanay dareenka iyo baraaruga lumin, ama nafteeda iyo ruuxdeedu ahayn wax dhintay.

Xaalada caynkaas ah caqligu ma ogola. Bal sheega cidda raali ka ah, in qof ama tira yari bakhaanbakh ku noolaadaan, cun oo cab ah, si kasta. Kumanaan qofna u dhintaan gaajo iyo macaluul. Yaa raali ka ah, in boqorka iyo caruurtiisu ugu ciyaaraan xoolaha ( umada) sida dadka waalan, dadkiina la'yihiin wax, gaajo awgeed dhabarkooda tiiriya, ama dhar cawradooda astura. Yaa ogol in dadka xoogiisii, halgamaan oo wax soo saaraan oo nolosha shaqa adag oo aan dhammaad lahayn ku jiraan, qolo kale , oo fara ku tiris ihina, ay ku jiraan dheelid iyo ku raaxaysiga wixii bulshadaa halgamaysaa tacabtay, iyada oo waliba aanay qolooyinkaasi abaal uugu hayn, kuna mahadinayn, dareensanayna , kuna baraarugsanayn tacabka daddkaa halgamaya ( e waxoodii ay kaligood cunayaan).


Yaa ogol in ay dhibaatoodaan dadkii xirfadlayda ahaa, ama maskaxda lahaa, ama dadaalka lahaa, ama hibada iyo toosnida lahaa, oo dhanka kale , ay badhaadhe ku noolaadaan, rag shaqadoodu tahay, sidee xoolaha loogu ciyaaraa, oo aqoon daro hayso oo xumo iyo khamri uun ka shaqeeya. Yaa ogol in la fogeeyo dadkii waxtarka iyo kartida iyo amaanada lahaa, oo loola dhaqmo, sidii dad nolosha ka dhacay, oo ay boqorka ku xeeraadaan koox naf ahaan iyo maskax ahaanba u liita, oo aan damiir lahayn, hamigooda kaliyina yahay sidee xoolo si kastaba loogu helaa, wax xirfada oo ay leeyihiina jirin, oo aan ahayn isku-dhajinta iyo amaanta (boqorka ), iyo dad aan waxba galabsan sidii ay u wanjali lahaayeen. Waxa kaliya ee lagu sifayn karaa waa dareen laawayaal, bilaa xishood ah.

Xaalada caynkaas ihi caadi maaha, maalin inay jirtana maaha, iska dhaaf sanada oo.

Haddii taasi taariikha hore ay dhacday, oo mudo socotay, waxa keenay baraarug la'aan umada ah, ama iyada oo la xoogay, iyo islaamkii oo hoos u dhac ku yimid oo Jaahiliyadii xoogaysatay. Waxase dhab ah in waxaasi burburayo oo kala daadanayo, mar kasta oo cadceeda islamku soo baxdo, oo baraaruga umadu tooso, oo umadu kacdo, iyada oo nafteeda iyo dadkeeda la xisaabtamaysa.

Waxa aan u sheegayaa kuwa wali ku nool, xiligii ALF-LAYLA-WA-LAYLA, in xiligaasi dhammaaday, markaa nafahoodu yaanay been u sheegin, oo yaanay naftooda saarin gaadhi banjaray oo burburay. Boqortooyadu waa faynuus shidaalkii ka dhammaaday oo dubaaladiisii gubatay, waana uu iska bakhtiyayaa, xataa hadii aan dabayli bakhtiin.

Islamka meel kuma laha, nooc kasta oo sad bursi ihi, islaamku ma ogola sad bursi , qof ama qoys, sida dalalkan reer bariga aynu ku aragno iyo dalalka islamka. Islamka meel kuma laha, sad bursiga koox is habaysay, sida ka jirta dalalka Europe iyo Maraykanka iyo Ruushka. Europe waa qaab xisbiyo, Maraykana waa hanti goosad, Ruushkana waa cid tira yar oo aaminsan shuuciyada xag jirka ah, kuwaas oo umadii kale dhakada ka haysta, waxana ay shaqaalaha iyo dadka jeelalka ku jira uula dhaqmaan si naxariis daro ah , iyo bahalnimo aan xad lahayn oo aan taarikhihii u xumaa ee caalamka lagu arag..



Sadbursigu nooc kasta oo uu leeyahay waa uu tagayaa ( dhammaanayaa), aadamuhuna waa uu ku kacayaa, si darana waa ay uga aar gudanayaan. Mustaqbalkana islam uun baa iska leh, islamka dusha badan ee dhexdhexaadka ah ee cadaalada badan, sad bursigu haba qaato waqti eh, oo hogaanka haba sii daysto eh, hana ku sii jiro baadidaa iyo qooqaa in muda ah e.

Sadbursigu, ama qof ha ahaado, ama qoys ama xisbi ama dabaqad, waa wax aan caadi ( dabiici) ahayn, xaga nolosha umada, umaduna fursada u horaysa ee ay hesho ayay LAAD KU DHUFANAYSAA. Sadbursi islamka meel kuma laha, meelna kuma laha bulsha baraarugsan oo qaangaadha, sii jiritaanka sadbursiguna ma laha rajo uu ku jiro. Waxa markaa u wanaagsan muslimiinta iyo dawladaha reer galbeedka, iyo hoggaankooda iyo madaxdooda inay ka faraxashaan iskagana tagaan sadbursiga, xidhiidh-kana u jaraan inta aanay iyaga iyo sadbursigu haadaamo iskala dhicin.

Waxa qoray

Aqoonyahan Sh Abul-Xasan Al-nadawi(ahun), 70 sanadood ka hor.

Waa Sheekh ku xeeldheer aqoonta taal muslimiinta gudahooda iyo ta reer galbeedkaba, , afafkoodana aqoon durugsan u leh.

Waxa turjumay **Sheekh. M. Xaji Maxamud Xirsi.**

# Itoobiyadii dhulku ku maqnaa ma bad baa loogu Darayaa?.



Waxay ahayd sanadihii 1880kii-maadkii, markii guumaystihii reer Yurub Afrika ay kala qaybsanaayeen. Xiligaa Itoobiya waxa ay ahayd dalkii kaliya ee Afrikaanka ah ee raacsanaa wadamada reer Yurub, ee weliba qaybta laxaad ka leh ka qaadatay gumaysiga dadka Afrikaanka ah la guumaysanaayey dalalkooda!, taas oo gumaystihii reer Yurub ku garabsanayeen Itoobiya diinta masiixiga ah, taas oo ahayd diinta gumaystihii reer Yurub wada haysteen, dhul Boobkii xiligaasna iyada oo waagaa Itoobiya dhulka ugu weyn ee qaybta loo siiyey waxa uu ahaa dhul, ka mid ahaa SOMALILAND, waa qaybtii Somaali-

Galbeed, markii lasiiyey Itoobiya ayaa Soomaali-galbeed layidhi se intii aan itoobiya gumayste u noqon dhulkaa Hooyo, Ingriiskaa taabay oo maamulka gacanta ku hayey oo Somaliland ayuu ka mid ahaa degelkaasi Soomaali-galbeed. sidoo kale waa dhul mihiim ahaa oodhulkii Hooyo ahaa waliba dhulkii hodonka ahaa ee wabiyada durdurka ah lahaa ee dalaguna ka baxaayey duunyaduna ku tarmaysay, Itoobiya marka ay la dhaxal wareegtay dhulkeenii Hooyo qayb kamid ah ama Somaliland oo xiligaa loo bixiyey, Itoobiya intaa kunay joogin ee tabtii abeesadii farta loo taagay ee Fanaxa u booday ayey

Isticmaarkii ingiriiska ka dalbaday in (Hawd iyo Reserve Aria) loogu daro, waana loogu daray, oo dhulkii Hooyo ee weynaa ee ingiriisku haleelay ee uu isticmaarka ku hantiyey, intii ugu badnayd Itoobiya ayuu ku wareejiyey, oo iyaga oo dad aynu isku midab maqaar nahay hadana gumaystihii saan-cadaalaha ahaa diin ku raacay oo dhul iyo dad boobkii reer Yurub ka gacan qaatay oo waliba inaka dhulkeenii iyo dadkeenii la wareegey oo welina ku haysta Isticmaarkii waagaa!, halka dhamaan dhulkii isticmaarka reer Yurub ee Afrika dhamaan wada xoroobeen oo dhulka dadkii lahaa dib loo hantisiiyey,

Itoobiya Soomaali-galbeed iyo hawd iyo (Reserve Area) weli sidii Isticmaarkii u siiyey ayey ula maqanyihiin oo marnaba aanay odhan waar dad isku midab ah baynu nahay wixii isticmaarkii reer Yurub waagaa aanu ku raacnay qalad bay ahayd ee xaalbaanu ka bixinaynaa dhulkiina sida ay reer yurubba u siiyeen madax banaanida ayaanu anana u siinaay weliba dad isku midab ah oo isku degel dhow ayeynu nahay ee xaal dheeraad ahna waanu ka bixinaynaa iyo magdhow mudadii aanu isticmaarka ku Haysanay, se taas in

Itoobiya tidhaahdaa waa baabacadaa oo timo kasoo baxaan!, waayo iyaga oo dhul ku maqanyahay ayey baddeena qaaliga ahna qarnigii 21aad oo cid dhul iyo bad dad leeyahay oo damac ka galaa jirin ama arin dhici kara ahayn ayuu ninka u madaxa ah ee Abii Axmed si cad oo gabasho lahayn u yidhi dal kayga waa in aan bad u helaa aan ugu helo tab iyo xoog tay iigu meel martaba!, Waa arin ka yaabiyey aduunka maxaa yeelay aduunka qarnigan 21aad wax loo fadhiyey maaha in dal ku baaqo dal kale baan boobayaa oo bad ka xoogayaa, se waa arin Itoobiya u hamuum qabtay oo uurka uu ku haystay oo afku ka xaday!.

Waxa aynu ogayn dhulkii NFD ee Kiiniya lagu daray waatii tidhi afti ayaan ka qaaday oo aan idhi Ma Kiiniya ayaad ahaanaysaan mise Soomaaliya ee ay yidhaahdeen Kiiniya dhulkii sadaa ku xalaashaday ee maantana NFD ay Kiiniya uga mid tahay!.

Bal hadaba Itoobiya oo qayb ka mid ah dhulkii hooyo ama soomaali-galbeed iyo soohdintii (reserve area) iyo hawd, oo sidii waagii isticmaarku jiray weli ula maqan halka isticmaarsigii aduunka qarnigii tagay la dabar jaray! ayey Itoobiya weli dhul weyn oo dhulkii hooyo ah oo hooyoley leedahay itoobiya haysataa say maantana damac ka hayaa in ay hantido obacdii dhulkii hooyo iyo qooriyadeedii qaaliga ahaa ee taariikhdii

Boqortooyadii hooyolaydu ku taalo ee boqorada Illaaha weyn ee Allah ee weligii Jiraha ah ee Joogaha ahi uu ku xusay quraanka kariimka ee hadalkiisii ah, boqoradii Mudnaa ee ka mudnaa Alle agtiisa degelkii uu eebe ku sheegey dilkii aaminka ahaa inagana dadkeenii Hore ee hooyoleyduna ku magac dhabi jireen dhulkii

Alle ama Allah in la yidhaahdo ummad Alle Waynaantiisa iyo kalinimadiisa rumaysnay oo rumaysan in uu ubad dhalay oo macatabad iyo laanqayr dheer sita uu Alle ganafka ku dhuftay oo Alle quraanka inoogu bayaamiyey in aynaan Aaminin, ayaanu keenaynaa oo inta aanu Calanka tawxiidka leh ka dejino dhulkii Alle dhulkii hooyo ayaanu calan dad macatabad lahi samaysteen aanu ka taagaynaa oo waliba magaaladii

Masaajidka taariikhiga ah ee labada qiblo lahaa ee dhaxalkeenii iyo taariikhdeenii iyo taariikhda ummada islaamkana ahaa aanu u ogolaanaynaa in gaalo la wareegto dagalkii uu ku yaalay oo aanu qarnigii 21aad ogolaanaynaa in kaniisado laga bineeyo oo LAAN qayro laga taago magaaladii diiniyan iyo taariikh iyana inoogu mudnayd. Waa waxaan dhici karin, waana dayuus nimo iyo diin iyo dhaqan bi's, ciddii soo Jeedisa arinkaa, ciddii ogolaataana kabasii daran!

Waxaynu ognahay waxan bariga dhexe ka dhacaya ee xasuuq ah ciidamada wax xasuuqaaya ee yu Huuda 45% waa xabashi ama ha ahaadaan falaashadii ama kuwa kale ee dagan, iminkana waxa la doonayaa in inta dhulkeena lagu dhejiyo xeelad si ay u ilaaliyaan doonyahan la bartilmaansanaayo ee marin biyoodka bada cas maraaya ee yu Huuda laguna badhxo ciidan u adeega gaalada wadamadan aan gaalada ahayn ee marin biyoodka bada cas wada kulaalaaya.

Hadal iyo dhamaan waxa aan ku soo afmeerayaa gabaygii Alle haw naxariistee Muxumad Cabdi Aw-Xaashi oo noolaa dabayaaqadii qarnigii 18aad ilaa badhtamihii qarnigii 19aad, Muxumed markii gumaystuhu Jeexaayey xuduuda ee lakala bineysanaayey dhulka hooyo ayuu dadka ku booriyey in ay ka dhiidhiyaan.

Dhulkoodaa sidii dalag beereed loo jeexjeexaayo ee laxuduudaynaayo wuxuuna si xigmad iyo murti xanbaarsan wax isku sheeg iyo waano uu ugu tiiriyey tix Halku dhigeedu AHAA qoonsada halkaa waxa ku jira qabar laxaad weyne) se markii waanadii iyo murti wax ugu sheeggiisii dheg Jalaq loosiin waayey, ee wixii uu uga digaayey dhacay ayuu tixda Hoos ku qoran uu mariyey, in aanay ku dhacdeen waxa maanta haystaa hadii ay hor itaagi lahaayeen gaalka Maalintii ay ku Haboonayd ee uu baraarujinaayey, waxa uu ku hayo

maanta, bal markaa dadka maanta ku andacoonaaya gaalkii isticmaarka inoo raacay ee dhulka baaxada weyn inagaga maqanyahay ee weli isticmaarsada ayaanu maantana bad iyo qoori xeebeedka dhulka hooyo ah ugu daraynaa waa waxaan sinaba u dhacahayn ee wax iska saxsaxeexow Ina Biixi!.

Allahayow is af garan waa' ama is Afgad la'aan iyo gaal jeclaysi hanagu ridin oo dib yaanay noo saamayn wixii hore gaalo nayeeshay Aamiin yaa rabi Aamiin

**WQ: Khadar Hooyoley (Fartaag).**

**Fartaagmuwaadin@gmail.com**

# Maxaa ina tusay waxa inaga maqan oo kaliya?

***Wali xabaalaha ma aaday? Qubuuraha waligaa ma tagtay adigoon qof..***



Wali dhakhtarka ma booqatay? Ma boqatay adigoo cafimaad qaba ? Ma booqatay adigoon qof xanuunsan utagin? Bal kawar doon waxyaabo badan baa kuu iftiimi doonee.

Wali xabaalaha aaday? Qubuuraha waliga tagtay adigoon qof ehelka ah qabrigiisa booqanin? Markaad tagtay maku yara nagaatay dushooda? Bal tiro ba dhawr jeer bishii gaadh qubuuraha ruuxdaadu waay isbadali dontaaye.

Dadka waalan mau fiirsatay? Kuwa naafada ah kawaran? Kuwa danyarta ah kawaran?

Xabsiyada Wali ma booqatay? Dadka ku xidhan ma ka waraysatay waxa ugu wayn ee aay doorbidayaan isla wakhtigaas? Bal isku day inaad saas yeeshid.

Agoonta wali ma la saaxibtay? Masakiinta ma la rafiiqday? Caruurta Mala ciyaartay waligaa? Wayeelka mala kaftantay?

Bal isku day inaad talaabooyinkaas qaadid si noloshaadu u yeelato dhadhan, qanaaco, xasilooni, kaadsiinyo iyo raaxo.

**WQ: Nur Nur Ibroz**

WARSAN
WACYI-GELIN | TOOSIN | DHISID
WAXA LAGA HELIKARAA:
Nabaad Supermarket (Shaqaalaha), National Book Centre (Km4) | Universal Bookshop (Hargeysa) | Al-Risaala Bookshop (Bossosa)
FOR ADVERTISING SPACE CALL:
+252 616 460 132
Email: warsan54@gmail.com

# kursi la weeraraa, kursi la weeraro ayuu leeyahay



"Siyaasigii weynaa ee Maxamed Abshir Muuse oo marna taliyihii booliska Soomaliya ahaan jiray lixdameeyaddii Ilaahay haw naxariistee, beri ayaa xafiis siyaasadeed ka furtay magaaladda Boosaaso ka dib burburkii dawladdii Dhexe.

Haddaba Maxamed Abshir masaajid u dhow xafiiskiisa ayuu salaadda subax ku tukan jiray ka dibna xafiiskiisa ayuu iman jiray halkaasoo uu siyaasiyiin badan kula shiri jiray. Haddaba dhowr jeer ayuu Maxamed Abshir u holadday ama doonay inuu salaadda subax tujiyo oo uu Sheekhii masaajidka ka codsaday. Sheekhii masaajidkuna wuu ka dhego adaygay codsigaasi. Maalintii danbe ayuu Sheekhii ka soo yara habsaamay xilligii salaadda subax la tukan jiray. Maxamed Abshir oo sida caadadu ahayd ka mid ahaa dadkii subax walba ku tukan jiray ayaa dadkii masaajidka ku dhiirri-geliyey inay iska sii tukadaan maadama aanu Sheekhii weli imaanin xiligaasi. Wax ay is yara adkeeyaanba, waa la aqiimay oo salaaddii waxaa tujiyey Maxamed Abshir.

Sheekhii ayaa yimid iyaddoo rakcadii labaad lagu jiro, jamacii ayuu xagga danbe kaga xidhay kolkuu dhameystayna intuu deg-deg kabahiisii u xidhay ayuu tegay xafiis siyaasadeedkii uu Maxamed Abshir ka ag furtay masaajidka.

Ninkii xafiiska hayey ayuu ku yidhi odaygii baan u baahanahaye, bal ii fur xafiiska aan ku sugee. Waa Sheekhii masaajidkee, waa la aqbalay oo xafiiskii Maxamed Abshir ayaa loo furay- waa ka kursigii intuu ku fadhiistay, weliba isku war-wareejiyey. Cabaar yar kadib, waxaa soo galay Maxamed Abshir oo kolkuu xafiiskiisii soo galay anfariir intuu yaabay ku yidhi sheekhii; "Waar Sheekh, sow adigan kursigaygii iyo xafiiskaygii fadhiistay!" Sheekhiina isagoon is lurin ayaa wuxuu ugu jawaabay hadal muhiimadiisu ay ahayd; "Ina Abshiroow kursi la weeraraa, kursi la weeraruu leeyahaye, adkeyso!" Yaab!"

**WQ: Jamaal CaLi Xuseen**

MOST POPULAR PROGRAMS
★ Faculty of Medicine and Surgery
★ Faculty of Education
★ Faculty of Computer Science & IT
★ Faculty of Engineering & Technology
★ Faculty of Sharea and Law
★ Faculty of Agriculture
★ Faculty of Veterinary
★ Faculty of Health Science
★ Faculty of Economic & Management
★ Faculty of Geoscience and Environment
★ Faculty of Dentistry
★ Faculty of Social Science
★ Faculty of Marine Science
BENADIR UNIVERSITY
Cultivating Human Talents
Prof. Addow Campus, Behind Seybiyano Mogadishu, Somalia
+2521 857536 / 857537 / 858990
info@bu.edu.so
https://bu.edu.so/

# BARAKA INSURANCE

*we protect you*

## OUR SERVICES



- CAYMISKA CAAFIMAADKA — HEALTH INSURANCE
- CAYMISKA GAADIIDKA — MOTOR INSURANCE
- CAYMISKA SAFARKA — TRAVEL INSURANCE
- CAYMISKA DHISMAHA — PROPERTY INSURANCE
- CAYMISKA ARDADA — STUDENTS INSURANCE

## CONTACT US

Giyaajo Business Center KM4, Mogadishu-Somalia.

+252 612 464 864
+252 637 555 597

info@barakatakaful.com
www.Barakatakaful.com

SOS CHILDREN'S VILLAGES

# TUULADA BARBAARINTA DHALLAANKA







# BENADIR UNIVERSITY

*Cultivating Human Talents*




## MOST POPULAR PROGRAMS

- ★ Faculty of Medicine and Surgery
- ★ Faculty of Education
- ★ Faculty of Computer Scicence & IT
- ★ Faculty of Engineering & Technology
- ★ Faculty of Sharea and Law
- ★ Faculty of Agriculture
- ★ Faculty of Veterinary
- ★ Faculty of Health Science
- ★ Faculty of Economic & Management
- ★ Faculty of Geoscience and Environment
- ★ Faculty of Dentistry
- ★ Faculty of Social Science
- ★ Faculty of Marine Science

**BENADIR UNIVERSITY**

*Cultivating Human Talents*

**Prof. Addow Campus, Behind Seybiyano Mogadishu, Somalia**

**☎ +2521 857536 / 857537 / 858990**

**info@bu.edu.so**

**https://bu.edu.so/**